QISOOYINKA NABIYADA



Daabacaddii 1aad

CABDIRAXMAAN CAQIIL

QISOOYINKA NABIYADA

MAHADCELIN

Ugu horrayn mahad oo idil waxa ay u sugnaatay Alle Subxaanah watacaalaa oo nagu mannaystay islaamnimo.

Waxaan halkan uga mahadnaqayaa dhammaan intii gacan ka gaysatay soo saarista dhiganahan, intii iga caawisay hagaajinta, tifaftirka, iyo soo diyaarinta, walaalayaal waad mahadsantihiin.

Waxaan sidoo kale u mahadnaqayaa ciddii akhrida oo sii gaarsiisa dadka kale.

Eebbe ha idin sharfo.

Tusmo

Hordhac..... 5

Qisadii Nabi Aadam.....6

Qisadii Nabi Nuux.....12

Qisadii Nabi Idriis 17

Qisadii Nabi Huud.....20

Qisadii Nabi Saalax.....25

Qisadii Nabi Ibraahim& ismaaciil 30

Qisadii Nabi Luud.....39

Qisadii Nabi isxaaq& Yacquub 43

Qisadii Nabi Yuusuf.....46

Qisadii Nabi Shucayb.....54

Qisadii Nabi Ayuub.....58

Qisadii Nabi Yuunus.....61

Qisadii Nabi Muuse& Haaruun.....64

Qisadii Nabi Daawuud.....75

Qisadii Nabi Suleymaan 78

Qisadii Nabi ilyas 83

Qisadii Nabi Sakariye& Yaxya 85

Qisadii Nabi Ciise.....89

Tixraac 93

Hordhac

Waxaan ku bilaabayaa magac Allaah, Allihii abuuray samaawaadka iyo arlada iyo inta ku dhexnool, Allihii uumay kownka nolosha iyo geerida..

Nabadgalyo iyo naxriis nabigeenna dushiisa ha ahaato.

Eebbe idankii waxa aan buug-yarahan kusoo koobay qisooyinka qaar kamid ah ambiyadii iyo rusushii loo soo diray insaanka si ay ugu iftiimiyaan nolosha.

Eebbe weyne Subxaanah watacaalaa waxa uu dunidan inoo keenay in uu insaanka imtixaano si loo garto kuwa camalka wanaagsan fala iyo kuwa camalada aan wacnayn ka yimaada, waxa uu Rabbi SW basharka u soo diray Rusushiisa si ay samaha u faraan xumahana ay uga waaniyaan.

Ahmiyad weyn ayay noo leedahay in aynu wax ka baranno qisooyinka nabiyada innaga oo raacayna dariiqii ay mareen ee ah dariiqa toosan.

Qur'aanka kariimka waxa uu si qotodheer u dulistaagay qisooyinka ummadihii soo maray dunidan, si loogu cibroqaato casharna ay ugu noqoto bani aadammka casri kasta oo ay noolyihiin.

Allaah Subxaanah watacaalaa oo inoo sheegaya ahmiyadda qisooyinka waxa uu yiri:

(لقد كان في قصصهم عبرة لؤلي الألباب)

Qisooyinkooda waxaa ugu sugan waano iyo wax ku qaadasho kuwa caqliga u saaxiibka ah.

Waxaan rajaynayaa in ummada soomaaliyeed ay ka faa'iidaan qisooyinka.

Dhiganahan waxa uu si fudud u soo koobayaa qaar kamid ah qisooyinka ambiyada iyo rusushii soo maray kawnkan iyo ummadihii loo diray.

Waxaa la socota qiso kasta iyo cashirada aan ka baran Karno, waxaan rajaynayaa in wax uun ummada u galo gaar ahaan ardayda, caruurta, iyo inta afka Soomaaliga wax ku akhrida. Ugu dambayn waxaan codsanaynaa in wixii khalad ah ama gaabis ahi hadday jiraan la iigu soo hagaajiyo Email-ka aan hoos ku soo qoray, Eebbe ha idin sharfo.

Cabdiraxmaan Caqiil **Soo saaristii koowaad**

Baydhabo - Soomaaliya **3 da Febraayo 2023**

Nabi Aadam Calayhi salaam

Abuuristii nabi Aadam

Allaah subxaanah watacaalaa markii uu doonay in uu abuuro Aadam ayaa waxa uu malaa'igtii ku yiri: Waxaan arlada u samayn khaliif amarkayga fuliya(Aadan), malaa'igta ayaa arrinkaa la yaab ka muujiyay, waxayna yiraahdeen: Ma waxaad samaynaysaa kuwo arlada fasahaadiya oo dhiig ku daadiya innagoo kuu tasbiixsana, Eebbe weyne waxa uu yiri: Wax aadan idinku ogayn baan ogahay.

Kaddib ciidda qaybaheeda kala duwan(madow, casaan, caddaan, I.w.m) waxa uu ka abuuray nabi Aadam Calayhi salaam, nabi Aadam waxaa laga abuuray dhoobo, dhererkiisuna wuxuu gaarayay ilaa 60 dhudhun.

Ibliis waxa uu kamid ahaa jinka, waxaana laga abuuray dab.

Nabi Aadam markii lagu afuufay ruuxda waxaa uu Allaah SW faray in uu u tago malaa'igta oo uu soo salaamo, kolkii uu u tegay malaa'igta waxa uu ku yiri: Assalaamu calaykum; kolkaas bay ku yiraahdeen: Wa calayka salaam waraxmatullaah, kaddib nabi Aadan wuxuu u soo laabtay Rabbi , waxaana loo sheegay in salaantaasi ay tahay salaantiisa iyo tan ummadiisa.

Kaddib nabi Aadan waxaa la baray magacyada waxyaabo badan, Sida geedaha, Dhagaxaanta, qorraxda, dayaxa, xiddigaha, I.w.m.

Eebbe weyne waxa uu malaa'igtii weydiiyay in ay sheegaan magacyada waxyaabo uu weydiiyay, markaasay malaa'igtii ku jawaabeen Rabbiyow Wax cilmi ah ma lihin annagu wixii aad na bartay mooyaane, kolkaas baa Alle SW amray Aadan in uu u sheego malaa'igta.

Allaah Subxaanah watacaalaa waxa uu faray malaa'igta in ay u sujuudaan Aadan

(Salaan) waxaase diiday salaanta kii Ibliis ahaa oo amarkii Rabbi iska kibriyay, Ibliis waxaa la weydiiyay sababta uu diiday amarka Allaah, wuxuuna ku jawaabay: Aniga ayaa ka fiican Aadan oo Aniga waxaa la iga abuuray dab aadanna waxaa laga uumay dhoobo! Xaasidnimada ibliis uu u qabo Aadam iyo dhashiisa xilligaas bay soo bilaabatay.

Allaah SW waxa uu faray ibliis in uu ka hoobto samada, waxaana lagu daray kuwa la eryay.

Ibliis waxaa laga soo eryay samada, naxriista Eebbe na waa laga fogeeyay, ilaahey wuxuu ku magacaabay; Sheydaan, Daaquut, kii la fogeeyay, kii la lacnaday, waxaana loogu goodiyay isaga iyo kuwa raaca in ay ku waari doonaan naarta Jahannama (Eebbe ha naga xijaabo).

Nabi Aadam oo Wehel jannada ka helay

Nabi Aadam muddo markii uu joogay oo uu dareemay kellinimo, ayaa maalin maalmaha kamid ah wuxuu seexday hurdo dheer, Eebbe weyne wuxuu doonay in uu abuuro Xawa si ay u wehliso Aadan, markii uu Aadan soo toosay wuxuu arkay haweeney qurux badan, way cajabisay, wuxuuna u muujiyay naxriis iyo daryeel.

Nabi Aadam iyo Xawa si wadajir ah ayay jannada ugu lugeynayeen u na cuni jireen miraha jannada, Allaah Subxaanah watacaalaa oo uga digaya Aadan cadaawadda Ibliis waxa uu ku yiri: Aadamoow Ninkaa Ibliis ahi wuxuu cadow ku yahay adiga iyo xaaskaaga ee yaanu jannada idinka saarin oo aanad dhibtoon, intaad jannada ku jirtaan ma harraadaysaan, mana gaajoon doontaan.

Shirqoolkii Ibliis

Ibliis markii jannada laga eryay wuxuu isku dayayay in uu soo dhuunto, balse ma awoodin in uu soo galo.

Eebbe weyne oo la hadlaya Xaawo iyo Aadam waxa uu yiri: Aadamoow adiga iyo xaaskaaga dega Jannada kana cuna cunno shifo iyo waasac ah meeshaad doontaan hana u dhowaanina geeddan oo Markaas aad ka midnoqotaan daalimiinta.

Ibliis oo markii horeba ka hinaasay Aadam, ayaa kolkii isaga sababtiisa Jannada looga soo saaray wuxuu u sii qaaday cuqdad iyo cadaawad tii ugu dambaysay, wuxuu bilaabay in uu waswaasiyo Aadam iyo Xaawa si ay u cunaan geedkaas laga xaarantinimeeyay, Ibliis wuxuu ugu dhaartay haddii ay geedkaas cunaan in ay noqon doonaan Aadam iyo Xaawa laba malag islamarkaana ay ka mid noqon doonaan kuwa la siiya waaritaan, wuxuuna u raaciyay Ibliis in uu la talinayo labadooda.

Aadam iyo Xaawa ayaa rumaystay arrinkaas oo judhiiba cunay geedkii loo diiddanaa, waxayna dareemeen in ay Alle caasiyeen, aad bay uga shallaayeen oo waxay dembidhaaf weydiisteen Allaah SW.

Aadam iyo Xaawa waxaa lagu amray in ay u daataan dhulka.

Dhulkii baa la yimid

Aadam iyo Xaawa markii ay dhulka yimaadeen waxay bilaabeen in ay cunto raadsadaan, Nabi Aadam waxa uu yaqaanay wax beerashada, wuxuuna gudagalay in uu cuntadiisa soo saarto.

Allaah Subxaanah watacaalaa waxa uu faray in arlada la camiro oo la dego, waxaa sidoo kale soo kordhay caruur ay dhaleen Nabi Aadam iyo Xaawa, halkii mar waxay dhalaysay mataano laba ilmood wiil iyo gabar ah, markii ay koreen waxaa la faray in wiil kasta loo guuriyay gabar aan caloosha wadaagin, ma bannaanayn in wiil iyo gabar mataano ah la isu guuriyo.

Haabiil iyo Qaabiil

Hooyadeen Xaawa uurkii koowaad waxay sidday wiil la oran jiray Qaabiil iyo gabar Kaliima la dhihi jiray.

Markii xigay waxay sidday laba ilmood oo la kala oran jiray Haabiil iyo Walaashiisa Labuuda. Qaabiil wuxuu ka shaqayn jiray beer, Haabiilna wuxuu dhaqan jiray xoolaha, waxayna saacidi

jireen labaduba waalidkooda, waxaa la gaaray xilligii labada nin midba kan kale uu la aqalgali lahaa gabadha walaalkiisa la maatanta ahayd, xilligaasi ma jirin insaan kale oo is guursada, nabi Aadam durriyaddiisa si ay u sii fiddo wuxuu faray guurka, iyo cibaadada.

Nabi Aadam baa yiri: Qaabiil wuxuu guursanayaa Labuuda, Haabiilna waa in uu guursadaa Kaliima oo la sheego in ay aad u qurxoonayd.

Qaabiil ayaa arrinkii ka xanaaqay oo yiri: Kaliima aniga ayay ila dhalatay, aniga ayaana guursanaya, nabi Aadam baa u sheegay in aysan u bannaanayn arrinkaas, balse Ibliis oo cadaawad u qaba Aadam ayaa u soo xaluushay dhashii Aadam, Haabiil iyo Qaabiil waxaa la faray in midba uu la yimaado Qurbaan oo ugu dhowaanayo Alle si loogu kala baxo arrinkan, ninkii qurbaankiisa la aqbalo ayaa guursanaya Kaliima.

Qaabiil waxa uu la yimid in yar oo uu beerta kasoo gurtay, halka Haabiil uu la shirtegay wan aad u weyn oo buuran, qurbaanka waxaa lagu aqbali jiray in dab uu samada ka yimaado oo uu wixii la keenay mid uun uu ka qaado. dabkii samada ka yimid wuxuu abbaaray wankii uu Haabiil la yimid.

Qaabiil ayaa ka hinaasay arrinkaa oo aad uga xumaaday.

Qaabiil oo dilay Haabiil

Sheydaan ayaa si weyn u waswaasiyay Qaabiil, wuxuuna maskaxdiisa ku riday in uu dilo walaalkiisa.

Haabiil oo shaqadiisa u socda ayaa Qaabiil oo dhagax weyn wata soo dabakacay, markii uu u soo dhawaaday ayuu ku dhuftay, halkaas ayuuna ku dhintay Haabiil, Sheydaan ayaa qosol la dhacay sidii uu ugu guuleystay qorshihiisana u hirgaley.

Nabi Aadam ayaa aad uga murgooday arrinkaas uu ku kacay Qaabiil.

Tuke cashar siinaya Qaabiil

Kaddib markii Qaabiil uu dilay walaalkii Haabiil, wuxuu in muddo ah dultaagnaa meydkiisa, wuxuu garan waayey sida uu ka yeeli doono, kaddib dhabarkiisa ayuu iska saartay oo uu ku xambaaray, isagoo xaaladdaasi ku sugan Qaabiil waxa uu arkay laba tuke oo is dilaya, mid baa dhintay oo dhulka ku dhacay, tukihii wax dilay baa bilaabay in uu god qodo, kolkii uu qodayna wuxuu ku riday tukihii uu isagu sababsaday, Qaabiil ayaa isagiina bilaabay in uu god qodo oo uu ku aaso Haabiil, kaddibna ciid oo dusha kaga daboolo isagoo qoomamaynaya baa wuxuu yiri Qaabiil: Ma waxaan ka caajisay wax uu tukahan sameeyay.

Nabi Aadam Calayhi salaam wuxuu sii noolaaday muddo dheer, awlaad badanna way u dhasheen, isaguna wuxuu barayey shareecada iyo diinta Alle, wuxuuna uga digayey shirkiga, shirqoolka, iyo dhagarta shaydaanka.

Geeridii Nabi Aadam

Nabi Aadam Calayhi salaam oo da'diisu sii badatay baa isagoo maalin xanuunsanaya malaa'igta u timid, kolkaas ayay ruuxda(nafta) ka qaadeen, oo way dhaqeen, carfiyeen, kafaniyeen , kaddib inta ay ku tukadeen ayay xabaasha ku aaseen, kaddib waxay dhashiisii ku yiraahdeen: Ina aadam waa tan sunnadiina aad mari lahaydeen.

Inta badan waa la isku khilaafaa halka uu ku aasan yahay nabi Aadam, waxaa inta badan la sheegaa in uu ku aasan yahay buurta uu ku soo degay oo ku taallaa Hindiya, Ilaahey baa og meesha nabi Aadam iyo Xaawa ay ku aasan yihiin.

Allaah SWT oo quraanka kariimka noogu sheegay qisada nabi Aadam CS waxa uu yiri:

إِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَائِكَةِ إِنِّي خَالِقٌ بَشَرًا مِنْ طِينٍ (71) فَإِذَا سَوَّيْتُهُ وَنَفَخْتُ فِيهِ مِنْ رُوحِي فَقَعُوا لَهُ سَاجِدِينَ (72) فَسَجَدَ الْمَلَائِكَةُ كُلُّهُمْ أَجْمَعُونَ (73) إِلَّا إِبْلِيسَ اسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ (74) قَالَ يَا إِبْلِيسُ مَا مَنَعَكَ أَنْ تَسْجُدَ لِمَا خَلَقْتُ بِيَدَيَّ أَسْتَكْبَرْتَ أَمْ كُنْتَ مِنَ الْعَالِينَ (75) قَالَ أَنَا خَيْرٌ مِنْهُ خَلَقْتَنِي مِنْ نَارٍ وَخَلَقْتَهُ مِنْ طِينٍ (76) قَالَ فَاخْرُجْ مِنْهَا فَإِنَّكَ رَجِيمٌ (77) وَإِنَّ عَلَيْكَ لَعْنَتِي إِلَى يَوْمِ الدِّينِ (78) قَالَ رَبِّ فَأَنْظِرْنِي إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ (79) قَالَ فَإِنَّكَ مِنَ الْمُنْظَرِينَ (80) إِلَى يَوْمِ الْوَقْتِ الْمَعْلُومِ (81) قَالَ فَبِعِزَّتِكَ لَأُغْوِيَنَّهُمْ أَجْمَعِينَ (82) إِلَّا عِبَادَكَ مِنْهُمُ الْمُخْلَصِينَ (83) قَالَ فَالْحَقُّ وَالْحَقَّ أَقُولُ (84) لَأَمْلَأَنَّ جَهَنَّمَ مِنْكَ وَمِمَّنْ تَبِعَكَ مِنْهُمْ أَجْمَعِينَ (85)

Xusuuso (nabi muxammadow) markuu Eebbe ku yiri malaa'igta waxaan ku abuurayaa dadka (aadam) dhoobo《》 Ee markaan isku simo oo aan dhammaystiro oo aan ku afuufo ruuxdayda ugu dhaca sujuud(salaan) 《》 Wayna sujuudeen malaa'igtii dhammaantood oo idil《》 Ibliis mooyee oo is kibriyay kana mid noqday gaalada《》 Eebbe waxa uu yiri Ibliisow maxaa kuu diiday in aad u sujuudo midkan aan ku abuuuray labadayda yad miyaad isweynaysay mise waxaad noqotay kuwa sarreeya ee is-qaadqaadaya 《》 Wuxuu yiri anaa ka kheyr roon isaga (aadam) waxaad igu abuurtay naar isaguna waxaad ku abuurtay dhoobo《》 Eebbe waxa uu yiri ka bax samadayda waxaad tahay mid la nacladay oo la fogeeyaye《》 Dushaadana waxaa ahaatay lacnaddayda tan iyo maalinta abaalmarinta《》 wuxuu yiri(ibliis) ilaahayoow ii sug ilaa maalinta la isa soo bixin doono 《》 Eebbe waxa uu yiri Waxaad kamid tahay kuwa loo kaadin doono ilaa maalinta waqtigiisa la yaqaano(Qiyaamaha)《》 Wuxuu yiri Weynidaada iyo sharaftaada sababteed ayaan ku dhaartay dhammaantood waan baadiyeyn 《》 Adoomahaaga suuban marka laga reebo《》 Eebbe waxa uu yiri dhabtaan ku sifoobaa dhabtaana u hadlaa 《》 waxaan ku dhaartay inaan ka buuxiyo jahannamo adiga iyo inta ku raacda oo kamid ah dadka oo idil ([1]).

---

[1]. Suuradda Saad.

Sidoo kale Allaah oo mar uu nooga warramay qisada Haabiil iyo Qaabiil waxa uu yiri:

وَاتْلُ عَلَيْهِمْ نَبَأَ ابْنَيْ آدَمَ بِالْحَقِّ إِذْ قَرَّبَا قُرْبَانًا فَتُقُبِّلَ مِنْ أَحَدِهِمَا وَلَمْ يُتَقَبَّلْ مِنَ الْآخَرِ قَالَ لَأَقْتُلَنَّكَ قَالَ إِنَّمَا يَتَقَبَّلُ اللَّهُ مِنَ الْمُتَّقِينَ (27) لَئِنْ بَسَطْتَ إِلَيَّ يَدَكَ لِتَقْتُلَنِي مَا أَنَا بِبَاسِطٍ يَدِيَ إِلَيْكَ لِأَقْتُلَكَ إِنِّي أَخَافُ اللَّهَ رَبَّ الْعَالَمِينَ (28) إِنِّي أُرِيدُ أَنْ تَبُوءَ بِإِثْمِي (30) وَإِثْمِكَ فَتَكُونَ مِنْ أَصْحَابِ النَّارِ وَذَلِكَ جَزَاءُ الظَّالِمِينَ (29) فَطَوَّعَتْ لَهُ نَفْسُهُ قَتْلَ أَخِيهِ فَقَتَلَهُ فَأَصْبَحَ مِنَ الْخَاسِرِينَ فَبَعَثَ اللَّهُ غُرَابًا يَبْحَثُ فِي الْأَرْضِ لِيُرِيَهُ كَيْفَ يُوَارِي سَوْءَةَ أَخِيهِ قَالَ يَا وَيْلَتَا أَعَجَزْتُ أَنْ أَكُونَ مِثْلَ هَذَا الْغُرَابِ فَأُوَارِيَ سَوْءَةَ أَخِي فَأَصْبَحَ مِنَ النَّادِمِينَ

Ku akhri dushooda warka labadii wiil ee ilmo nabi Aadam ahaa si dhab ah markay ilaahey ugu dhawaadeen sadaqo oo laga aqbalay midkood kii kalena aan laga aqbalin oo uu yiri waan ku dili kii kalena waxa uu yiri ilaahey waxa uu wax ka aqbalaa kuwa dhowrsada oo ka baqa《》 Haddad u soo fidiso gacantaada xaggayga si aad ii disho anigu gacantayda kugu fidin maayo si aan ku dilo anigu ilaahey baan ka cabsanayaa Eebbaha caalamaka《》 Anigu waxaan doonayaa inaad la noqoto oo xambaarato dembigayga iyo kaagaba dabadeedna aad kamid noqoto naarta ehelkeeda taasina waa abaalka daalimiinta《》 markaasay u qurxisay naftiisa dilka walaalkiis wuuna dilay wuxuuna noqday kuwa khasaaray《》 Wuxuu Eebbe u bixiyay (muujiyay) tuke faadhi dhulka si uu u tuso sida uu u asturo maydka walaalkii wuxuuna yiri Shalaytadeydiiyeey miyaan ka caajisay inaan noqdo sida tukaha oo aan asturo maydka walaalkey wuxuuna ahaaday mid qoomameeya([2]).

Maxaynu ka baran karnaa qisada?

1. Nabi Aadam waa aabbaha basharka oo idil.

2. Sheydaanku waa cadowga insaanka.

3. Macsiyada ayaa sabab u ah carrada Alle.

4. Insaanka waxaa lagu magacaabay insaan, sababtoo ah waxbuu ilaawaa.

5. Waalidiinta oo la adeeco waxay sabab u tahay raali ahaanshaha Allaah.

6. Nabiyada oo idil waxay la yimaadeen islaam.

7. Insaanka waxaa loo abuuray cibaado.

8. Sheydaanka wuxuu ku dadaalaa in uu xumaan lugaha kuu geliyo.

9. Alle wuu jecel yahay qofka mu'minka ah ee isaga dartii wax u la baxa.

10. Qofkii ugu horreeyay ee dil bilaaba wuxuu ahaa Qaabiil.

11. Qofkii ugu horreeyay ee arlada lagu dilay wuxuu ahaa Haabiil.

---

[2]. Suuradda Al maa'idah

Nabi Nuux Calayhi salaam

Nabi Nuux calayhi salaam

Waa nabiga ugu weyn marka laga soo tago Nabi Aadam, abtirsiimadiisa waxaa la sheegaa inuu galo Shiith ina Aadan.

Culimada taariikhda waxay inta badan farta ku fiiqaan in Nabi Nuux uu ku noolaa ciraaq iyo shaam,

Fadligiisa

▪Nabi Nuux wuxuu kamid ahaa nabiyada ulul-cazmiga oo ah shanta nabi ee ugu fadliga badan nabiyada.

▪Qur'aanka kariimka ah waxaa lagu sheegay 43 jeer, iyo suurado badan, taas oo ina tusaysa inuu yahay qof fadli badan ku dhex leh basharka, iyo in lagu daydo.

▪Waa Rasuulkii ugu horreeyay ee loo diray ummad.

▪Alle wuxuu ku tilmaamay addoon shukri badan.

▪Waa nabigii ugu waqtiga dheeraa ee ka shaqeeya dacwada Alle, 950 sano ayuu diinta ugu wacayay.

▪Waa shiikha Anbiyada.

▪Waa awowga labaad ee basharka.

Ummadii nabi Nuux

Nabi Aadam calayhi salaam- waa aabbaha basharka, waxa uu ahaa nabigii ugu horeeyay ee

Arlada, waxa uu ku dadaalay in uu caruurriisa, iyo duriyaddiisa baro towxiidka, iyo in cibaadada Alle kaliya ay ugaar tahay, waxa uuna ka reebay shirkiga, iyo caabudidda cid aan Alle ahayn, waxa uu uga digay khatarta sheydaanka, waxa uuna u cadeeyay in ibliis uu yahay cadowga Alle.

Muddo ayaa kasoo wareegatay geeridii nabi Aadam calayhi salaam, tirada basharka waa ay korortay, waxay caabudayeen Alle oo kaliya, ma aysan aqoon shirkiga, dhowr qarni kadib dardaarrankii nabi Aadam ayaa la ilooway, haddana waxaa jiray dad wanaagsan oo markasta dadka xusuusiya wanaagga.

Billowgii sanam-caabdudka

Xilliyadaasi waxaa soo shaacbaxay in si weyn loo xuso dadkii wanaagsanaa ee geeriyooday, lana buunbuuniyo, iyo xabaalahooda si loogu deydo camalkooda wanaagsan, balse jiilkii ka dambeeyay ayaa sheydaan uga dhigay in dadkaasi la caabudi jiray, islamarkaana wuxuu cagta u geliyay shirki iyo dembiyo waaweyn, waana markii ugu horraysay ee dhulka dushiisa lagu caabudo sanam.

Nabi Nuux oo lasoo diray

Nabi Nuux calayhi salaam wuxuu ahaa qof rumaysan Allaah, waxa uu u tagay qowmkiisa isaga oo ugu yeeraya rumeynta Allaah keligii oo aan wax la la wadaajin, Wuxuuna dhihi jiray: Qowmkaygiyoow Anigu waxaan idin ahay mid idin diga oo waliba digniin cad ah, Waxaan idin leeyahay Alle caabuda oo ka baqa ammarkiisana qaata.

Balse hadalkii nabi Nuux dhegaha ayay ka furaysteen oo way iska indhatireen,waxayna dhihi jireen Adigu wax aad na dheertahay ma jirto, dadka adiga ku raacayna waa kuwa u liita bulshada dhexdeeda.

markasta oo uu xagga Rabbi ugu yeero nabi Nuux dhegaha ayay faraha gashan jireen, haddana nabi Nuux wuxuu juhdi iyo dadaal ku bixiyay inuu u naseexeeyo qowmkiisa, nabi Nuux wuxuu xusuusin jiray fadliga iyo nimcada oo Alle ku mannaystay qowmkiisa.

Haddii qof iyaga kamid ah uu dareemo in geeridiisa ay soo dhowdahay wuxuu u dardaarmi jiray caruurtiisa, wuxuuna dhihi jiray: iska ilaaliya ninkaas yaanu diintiina idinka saarine.

Nabi Nuux wuxuu sii waday dacwadiisa, haddana qowmkiisa waxay gacanta kula jireen fisqi iyo macaasi, wuxuuna dacwadii waday 950 sano oo uu diinta ugu yeerayay qiyaamahana xusuusin jiray, waxaa la sheegaa inay rumeeyeen dad tiro ahaan aad u yar, dhowr iyo siddeetan qof ayaa lagu sheegaa dadkii rumeeyay, waxaase la yaab leh in xaaskiisii oo ay dadka ugu dhowayd aysan rumayn oo kufriday,

Nabi Nuux ayaa Allaah baryay oo yiri: Rabbiyoow Aniga waa la iga adkaaday ee ii gargaar,

Allaah subxaanah watacaalaa ayaa u waxyooday nabi Nuux in aysan rumayn doonin intii horay u rumaysay mooyee, sidoo kale uusan isku murjin waxay samaynayaan, nabi nuux ayaa Alle ka baryay inaan arlada korkeeda looga tagin wax gaal ah, waxaana la faray inuu uu sameeyo doon ay fuulaan isaga iyo intii rumaysay.

Nabi Nuux calayhi salaam wuxuu guda-galay samaynta doonnidii la faray, Alle subxaanah watacaalaa ayaa u waxyooday sida loo sameeyo doonta, qowmkiisa markii ay arkeen nabi Nuux oo doonni samaynaya waxay bilaabeen inay ku jeesjeesaan, waxayna dhihi jireen Nuuxow ma

najaar baad noqotay oo nabinimadii ma iska daysay? Wuxuu nabi Nuux ku warcelinayay: Haddaad iminka nagu jeesjeestaan innaga ayaa idinku jeesjeesi doonnaa idamka Alle.

wuxuu dhisay doon aad u weyn oo ka kooban seddex dabaq, oo dabaqa hoose la dejiyay wuxuushta, iyo dugaagga, qaybta dhexena waxaa la dejiyay daabooyiinka iyo shimbiraha, dabaqa sarena waxaa degay nabi Nuux iyo intii rumaysay, waxaana la faray in xayawaanaadka nooc waliba lab iyo dheddig laga saaro doonta, doonnida socodkeeda iyo joogsigeeduba wuxuu ku xiranyahay Bissinka.

Calaamaddii Halaagga

Allaah subxaanah watacaalaa ayaa u waxyooday nabi Nuux in calaamadda uu ku garanayo xilliga uu cadaabka imanayo ay tahay in tanuurka muufada uu biyo kasoo baxo, sidii ayaana dhacday, dhulka ayaa ilo biyo ah ka dillaacay, cirkuna wuxuu keenay biyo aan kala go' lahayn , biyihii dhul iyo cir ayaa is-qabsaday, mowjado waaweyn oo buuraha oo kale ah ayay dul-sabbaynaysay doonnida.

Halka uu ku dambeeyay wiilkii caasiga ahaa

Markii Rabbi faray nabi Nuux in doonnida uu saaro xayawaanaadka, shimbiraha, dugaagta, iyo dadkii rumeeyay, nabi nuux wuxuu xiray iridda doonnida, waxaana arladii isku shareeray mawjado biyo ah.

Nabi Nuux wuxuu ugu yeeray wiilkiisa inuu soo raaco doonta, balse wiilkii ayaa ka dhaga-adaygay, wuxuuna yiri: waxaan tagi doonnaa doon iga ilaalinaysa biyaha, nabi nuux ayaa ku jawaabay: Maanta ma jiro wax kaa ilaalin kara halaagga ilaahey, Alle cidda u naxriisto mooyee, iyagoo sidaa u wadahadlaya waxaa dhexgalay hirkii butaacayay, wiilkaasina halkaas buu ku qarqoomay.

Nabi Nuux wuxuu u dhawaaqay Rabbi, wuxuuna yiri: Rabbiyoow wiilkayga wuxuu kamid ahaa ehelkayga, ballantaaduna waa dhab, kuwa wax xukuma adaa u xukun wanaagsan.

Allaah ayaa u jawaabay nabi Nuux, wuxuuna Alle yiri: Nuuxow wiilkani ehelkaaga kama mid aha, isagu wuxuu la yimid camal aan wanaagsanayn, wax aanad aqoon u lahayn ha i weydiin, Anigu waxaan kaa waaninayaa inaad juhalada kamid noqoto.

Nabi Nuux ayaa Alle weydiistay dembi-dhaaf iyo naxariis.

Dadkii Alle ku caasiyay halkaas ayaa lagu halaagay, dhulka ayaa sidiisii hore kusoo laabtay, Alle wuxuu yiri: Dhulkoow biyahaaga iska liq,cirkiiyoow adiguna jooji biyaha, halaagiina waa la dhameeyay, doonnidiina waxay isku qotomisay oo joogsatay buur uu Alle u diyaariyay, buurtaas waxaa la sheegaa in ay ku taallo woqooyiga Ciraaq.

Markale ayay noloshii ku soo noqotay dhulka, dadka dhulka joogayna waxay ahaayeen mu'miniintii rumeeyay nabi Nuux calayhi salaam.

Eebbe weyne isaga oo nooga warramaya qisada nabi Nuux waxa uu yiri:

إِنَّا أَرْسَلْنَا نُوحًا إِلَى قَوْمِهِ أَنْ أَنْذِرْ قَوْمَكَ مِنْ قَبْلِ أَنْ يَأْتِيَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ (1) قَالَ يَا قَوْمِ إِنِّي لَكُمْ نَذِيرٌ مُبِينٌ (2) أَنِ اعْبُدُوا اللَّهَ وَاتَّقُوهُ وَأَطِيعُونِ (3) يَغْفِرْ لَكُمْ مِنْ ذُنُوبِكُمْ وَيُؤَخِّرْكُمْ إِلَى أَجَلٍ مُسَمًّى إِنَّ أَجَلَ اللَّهِ إِذَا جَاءَ لَا يُؤَخَّرُ لَوْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ (4) قَالَ رَبِّ إِنِّي دَعَوْتُ قَوْمِي لَيْلًا وَنَهَارًا (5) فَلَمْ يَزِدْهُمْ دُعَائِي إِلَّا فِرَارًا (6) وَإِنِّي كُلَّمَا دَعَوْتُهُمْ لِتَغْفِرَ لَهُمْ جَعَلُوا أَصَابِعَهُمْ فِي آذَانِهِمْ وَاسْتَغْشَوْا ثِيَابَهُمْ وَأَصَرُّوا وَاسْتَكْبَرُوا اسْتِكْبَارًا (7) ثُمَّ إِنِّي دَعَوْتُهُمْ جِهَارًا (8) ثُمَّ إِنِّي أَعْلَنْتُ لَهُمْ وَأَسْرَرْتُ لَهُمْ إِسْرَارًا (9) فَقُلْتُ اسْتَغْفِرُوا رَبَّكُمْ إِنَّهُ كَانَ غَفَّارًا (10)

Annagaa nabi Nuux u diray Qowmkiisa si uu ugu digo cadibaad horteed《》 Wuxuu ku yiri Qowmkaygoow waxaan idin ahay dige cad oo muuqda 《》 ee Eebbe caabuda kana dhowrsada oo i adeeca《》 Wuu idin dembidhaafi wuuna idin dib dhigi ilaa muddo magacaaban marka Eebbe la yimaado ajasha wax dib u dhigid ahi majirto haddaad wax ogtihiin《》 nabi Nuux waxa uu yiri Rabbiyow waan u yeeray qowmkayga habeen iyo dharaar 《》 U yeeritaankaygana uma siyaadin wax aan carar ahayn《》 markasta oo aan ugu yeerana si aad ugu dembidhaafto waxay farahooda yeelaan dhegahooda maryahoodana way isku dadaan wayna ku madax adaygaan xumaanta wayna isweyneyaan 《》 si kor ah ayaan ugu yeeray dadka dhexdiisa 《》 waana u qeyliyay (cod sare) hoosna waan ugu yeeray《》 Waxaan ku iri Rabbigiin dembidhaaf weydiista waa dembidhaaf badane([3]).

Maxaynu ka baran karnaa qisadani?

▪Shaydaan waa cadowga ugu weyn basharka.

▪Shaydaan ayaa sabab u ahaa caabudidda sanamyada.

▪Shaydaan oo la raaco waxaa laga dhaxlaa cadaab adduun, iyo mid aakhiro.

▪Nabi Nuux waa aabbaha labaad ee basharka.

▪Duufaantu waa nucjiso xagga rabbi ka timaadda.

▪Ilaahey wuxuu u gargaaraa addoomadiisa mu'miniinta ah, wuxuuna halaagaa kaafiriinta iyo daalimiinta.

---

[3]. Suuradda Nuux

Nabi Idriis Calayhi salaam

Nabi idriis

Nabi idriis Calayhi salaam, waxa uu kamid ahaa nabiyadii ilaahey Qur'aankiisa ku sheegay.

Waxa uu Rabbi Subxaanah watacaalaa ku tilmaamay in nabi idriis uu ahaa nabi run badan.

Waxa uu socon jiray arlada, dadka ayuu ugu yeeri jiray in ay Alle kaliya caabudaan, waxa uu dadka bari jiray culuum kala duwan sida: waxqorista, waana qofkii ugu horreeyay ee qalin wax ku qora, waxaa la sheegaa in uu ahaa qofkii bilaabay tolidda iyo samaynta dharka, waxa uu ahaa mid tasbiix badan.

Waxa uu dadka baray wax beerashada, dhismaha, iyo Injineeriyadda.

Waxaa la sheegaa in uu dhisay magaalooyin badan.

Nabi idriis Eebbe mar uu ka warramay waxa uu yiri:

وَاذْكُرْ فِي الْكِتَابِ إِدْرِيسَ إِنَّهُ كَانَ صِدِّيقًا نَبِيًّا (56) وَرَفَعْنَاهُ مَكَانًا عَلِيًّا (57) أُولَئِكَ الَّذِينَ أَنْعَمَ اللَّهُ عَلَيْهِمْ مِنَ النَّبِيِّينَ مِنْ ذُرِّيَّةِ آدَمَ وَمِمَّنْ حَمَلْنَا مَعَ نُوحٍ وَمِنْ ذُرِّيَّةِ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْرَائِيلَ وَمِمَّنْ هَدَيْنَا وَاجْتَبَيْنَا إِذَا تُتْلَى عَلَيْهِمْ آيَاتُ الرَّحْمَنِ خَرُّوا سُجَّدًا وَبُكِيًّا

Ku sheeg kitaabka nabi idriis wuxuu ahaa run badane nabi ah《》 waxaan u koryeellay meel sare《》 Kuwaasi waa kuwuu u nimceeyay Eebbe oo nabiyadii ah oo durriyaddii aadam ah iyo kuwaan xambaaray lajirka nabi nuux iyo durriyaddii nabi ibraahim iyo israa'iil(Yaqcuub) iyo kuwaan hanuuninay oon doorannay marka lagu akhriyo dushooda aayadaha Eebbaha Raxmaanka ah way dhacaan iyaga oo sujuudi oo ooyi([4]).

---

[4]. Suuradda Maryam.

Maxaynu ka barannaa Qisadani ?

1. Cibaadada Alle oo kaliya ayay u sugnaatay.

2. Qofka mu'minka ah waa qof tasbiix badan.

3. Mu'minka waxa uu dadka la jeclaadaa wixii uu naftiisa la jeclaado.

4. Mu'minka waxa uu dadka baraa wixii waxtar u leh.

5. Qofka mu'minka ah wuxuu u adeegaa qoyskiisa iyo bulshadiisaba

Nabi Huud Calayhi salaam

Nabi Huud

Kaddib halaagii qabsaday qowmkii nabi Nuux, waxaa dib u soo kobcay basharka, tiradooda ayaa soo badatay, waxayna kala degeen goobo kala duwan.

Qowmka reer Caad waxay degeen inta u dhaxaysa Cumaan iyo Yaman, dhulkaasi oo lagu magacaabi jiray Ax-qaaf.

Waxay ku abtirsadaan Saam ibnu Nuux, waxay ahaayeen dad dhaadheer oo xoog badan , waxay dhisteen magaalo aan horay loo arag oo la dhihi jiray Iram, waxay lahaayeen dhulbeereed, ilo, waxay aasaaseen magaalooyin, iyo xadaarad.

Nimcooyinkii Alle ku mannaystay kuma shukrin, waxay dib u caabudeen sanamyadii horay dad loogu halaagay, waxay ahaayeen dad kibir iyo dulmi badan.

Allaah Subxaanah watacaalaa Wuxuu u soo diray walaalkooda Huud, oo kamid ahaa kuwooda ugu reer fiicnaa, guri ahaanna ugu caansanaa, wuxuu nabi Huud ugu yeeray dadkiisa inay caabudaan Allaah oo kaliya, wuxuuna faray inay iska daayaan caabudista sanamyada, wuxuuna ka reebay dulmiga, iyo xad-gudubka.

Waxay yiraahdeen: Yaa naga xoog badan innaga?

Waxay iloobeen in Aabbihii abuuray uu iyaga ka xoog badanyahay.

Waxay ku yiraahdeen: Huudow adigu waxaan kuu aragnaa inaad tahay mid caqli yar oo doqon ah, waxaan u filaynaa inaad kamid tahay beenaalayaasha.

Nabi Huud wuxuu ku Oran jiray: Qowmkaygiyoow caqli-yari ima haysato, ee waxaan u imid inaan Alle xaggiisa idinku yeero, waxaan doonayaa inaan idin soo gaarsiiyo risaalada Rabbi, waxaan ahay mid idin naseexeeya.

Wuxuu nabi Huud gudagalay inuu xusuusiyo nimcooyinka uu Alle ku mannaystay, iyo inuu uga digo cadaabka ilaahey, iyo carradiisa, iyo wixii ku dhacay qowmkii nabi Nuux oo kale in iyaguna haleelo.

Nabi Huud wuxuu ku Oran jiray: Qowmkaygiyoow Alle dembidhaaf weydiista, oo u towbad keena, Alle ayaa roob tiro badan idinka soo diraya samada, awoodiinna awood kale ayaa la idinku siyaadinayaa, ee ha jeesanina idinkoo mujrimiin ah.

Waxay ku warceliyeen qowmkiisa: Huudow wax cadaymo ah nooma keenin, innaguna ilaahyadeennii kama tagayno, adiguna kuma rumaynayno.

Sidaas ayayna noqotay jawaabtii reer caad, waxay ku adkaysteen sanamyadooda, waxayna yiraahdeen: Wixii cadaab ah ee aad sheegayso soo daa Huudow haddii aad run sheegayso.

Billowgii Cadaabka

Muddo badan oo uu waday dacwada nabi Huud, Waxaa rumeeyay tiro yar oo dadkii reer caad kamid ahaa, dadka intoodii badnayd waxay ku madax-adaygeen gaalnimadoodii, ilaahey wuxuu ku salliday roob la'aan iyo abaar daran, sidaas ay tahayna way madax-adaygeen, qaar iyaga kamid ahaa ayaa rabbi baryay, waxaana la arkay saddex daruurood oo midi caddaan tahay, Midna casaan tahay, Midna madow tahay, markii la kala dooransiiyay saddexdii Saxaab waxay doorteen tii madowga ahayd iyagoo u haysta in roob badani uu ku jiro, nabi Huud ayaa loo waxyooday in daruurahani ay sidaan dabaylo wax halaaga, waa dabaylo dhawaaqooda iyo xooggooda aan loo adkaysan karin, dabaylahaasi wax roob ah lama socon ee waa cadaabkii ay dalbanayeen reer caad.

waxayna socotay siddeed maalmood iyo toddobo habeen, reer caad ayaa meeshii wada daatay, waxay noqdeen kuwo aan la arkin ilaa guryahooda mooyee.

Allaah wuxuu badbaadiyay nabi Huud Calayhi salaam, iyo mu'miniintii la socotay.

Reer caad markii ay iska dhegatireen hadalkii Allaah oo ay isbideen awood, iyo xoog, islamarkaanna ay iloobeen nimcooyinkii faraha badnaa inay ku shukriyaan, macaasidoodana ay badatay, waxaa qabsaday dabaylo halaag ah.

Allaah SWT oo qisada Reer Huud nooga warramay waxa uu yiri:

كَذَّبَتْ عَادٌ الْمُرْسَلِينَ (123) إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ هُودٌ أَلَا تَتَّقُونَ (124) إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ (125) فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ (126) وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى رَبِّ الْعَالَمِينَ (127) أَتَبْنُونَ بِكُلِّ رِيعٍ آيَةً تَعْبَثُونَ (128) وَتَتَّخِذُونَ مَصَانِعَ لَعَلَّكُمْ تَخْلُدُونَ (129) وَإِذَا بَطَشْتُمْ بَطَشْتُمْ جَبَّارِينَ (130) فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ (131) وَاتَّقُوا الَّذِي أَمَدَّكُمْ بِمَا تَعْلَمُونَ (132) أَمَدَّكُمْ بِأَنْعَامٍ وَبَنِينَ (133) وَجَنَّاتٍ وَعُيُونٍ (134) إِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ عَظِيمٍ (135) قَالُوا سَوَاءٌ عَلَيْنَا أَوَعَظْتَ أَمْ لَمْ تَكُنْ مِنَ الْوَاعِظِينَ (136) إِنْ هَذَا إِلَّا خُلُقُ الْأَوَّلِينَ (137) وَمَا نَحْنُ بِمُعَذَّبِينَ (138) فَكَذَّبُوهُ فَأَهْلَكْنَاهُمْ إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِين

Reer Caad waxay beeniyeen Rusushii《》 Markuu ku yiri walaalkood Huud miyaydaan dhowrsanayn《》 anigu waxaan idin ahay rasuul aamin ah《》 Ee Alle ka baqa oo i adeeca《》 idinkamana warsanayo xaqa ujuuro ajirkayga Eebbaha caakamkaan ka sugi《》 miyaad ka dhisaysaan meel sare oo dhan calaamad idinkoo ciyaaraya《》 ma waxaad samaysanaysaan dhismayaal waaweyn sida idinkoo waaraya《》 Haddaad wax qabataanna ciqaabtaaan una ciqaabtaan ai darran《》 Eebbe ka cabsada oo i adeeca《》 ka dhowrsada Eebbaha idin siiyay waxaad ogtihiin《》 wuxuu idin siiyay oo idinku xoojiyay xoolo iyo caruur《》 Beero iyo ilo《》 waxaan idinka cabsanayaa maalin weyn cadaabkeeda《》 waxay dhaheen waxaa isku kaayamid ah haddaad na waaniso iyo haddii aadan na wacdinba《》 waxaad naga waaninayso waa dhaqanka ummadihii hore《》 annaguna nala cadaabi maayo《》 way beeniyeen kolkaasaan halaagnay taasina waxaa ku sugan aayad/ calaamad mana aha kuwo rumeeya badankoodu([5]).

---

[5]. Al shucaraa.

Maxaynu ka baran karnaa qisadani ?

▪Awood iyo xoog ciddii isbidda, iskana illowda Allaah inuu yahay abuuraha khalqiga waxay ku dambayn doonaan meel aan wanaaagsanayn.

▪In lagu shukriyo nimcada waxay siyaadinaysaa nimcada.

▪Qofku inuusan dalban cadaab iyo musiibo.

▪Ilaahey wuxuu ilaaliyaa addoomadiisa mu'miniinta ah, wuxuuna ka badbaadiyaa dhagarta gaallada.▪Shirkiga waa sababta ugu weyn ee lagu halaagsamo if iyo aakhiro.

Nabi Saalix Calayhi salaam

Nabi Saalix

Reer Thamuud waxa ay degganaayeen dhulkii Al-xijri oo ku beegan inta u dhaxaysa madiina iyo Tabuuk.

Waxay kasoo jeedaan Saam ibnu Nuux sida Taariikhyahannadu ay sheegaan.

Deegaankoodu wuxuu ahaa dhul beero, daaq, ilo, iyo geed timireed hodan ku ah, ilaahey wuxuu siiyey awood aad u sarraysa,, waxay guryo ka samaysan jireen buuraha, waxaa la sheegaa in ninka reer Thamuudka ah uu qori jiray dhagxaanta waaweyn, si uu guri uga samaysto.

Nimcooyinkan faraha badan ee Allaah u sahlay reer Thamuud intii ay ku shukrin lahaayeen, waxay u wareegeen gaalnimo, sanam, iyo fasahaadinta arlada, Alle subxaanah watacaalaa Wuxuu u soo saaray nabi Saalix calayhi salaam, farriintii nabi saalixna waxay ahayd, in la iska daayo Asnaamta, Alle kaliya la caabudo, fasahaadkana laga daayo arlada.

Nasiixadii Nabi Saalix

Nabi saalix wuxuu ugu tegay goobihii ay fariisan jireen reer Thamuud, isaga oo xusuusinaya Allaah, wuxuuna ku waanin jiray: Qowmkaygiyoow ilaahey caabuda, Alle aan isaga ahayn ma jiro, isaga ayaa idin quudiya, kaddib waxay ku warceliyeen: Ma waxaad naga reebaysaa inaan caabudno wixii ay caabudi jireen aabbayaashadu, waxaad waddo shaki ayaan ka qabnaa saalixoow.

Nabi saalix wuxuu isku dayay inuu soo xusuusiyo nimcooyinka Alle, wuxuuna yiri: Bal xusuusta nimcooyinka uu Alle idinku mannaystay, Alle wuxuu idin dhaxalsiisay dhulkii, iyo ilbaxnimadii ay ka tageen reer caad, dhul aad u fiican oo aad qasriyo ka dhisateen ayaa la idin siiyay, buurahana waxaad ka samaysateen guryo dhaadheer, war xusuusta nimcooyinka, iyo gallada uu Alle idin siiyay, oo kaligii caabuda, dhulkana ha fasahaadinina.

Marna kama caajisin nabi Saalix inuu diinta ugu yeero qowmkiisa, haddana dadkii rumeeyay waxay ahaayeen ducafadii, iyo dadkii tabarta yaraa.

Xilli kasta oo uu dacwada ugu yeero nabi Saalix, waxay si jeesjees ah u oran jireen: markii hore waan ku jeclayn, oo waxaan kugu ixtiraami jirnay cilmigaaga, iyo caqligaaga, waynu ku

rumaysan jirnay berrigii hore, balse rajadayadu way ka dhimatay dhankaaga, oo mid waalan baad noqotay.

Hashii kasoo baxday dhagaxa

Qowmkii reer Thamuud oo goob ku shirsan ayaa waxaa u tegay nabi Saalix calayhi salaam, waa uu wacdiyay, wuxuu xusiisiyay Alle sidii caadadu ahayd, waxay ku yiraahdeen: Saalixoow kuma rumayn karno ilaa dhagaxan aad kasoo saarto hal aad u weyn oo qurux badan, qarka u saaran inay dhasho, waana inay halkaas ku dhashaa, haddii aad sidaas noo samayso waxaan rumayn doonnaa Allaah.

Nabi saalix wuxuu baryay Allaah Subxaanah watacaalaa, inuu u soo saaro hasha ay sheegayaan, si lamafilaan ah waxaa dhagixii ayaa dillaacay, waxaana kasoo baxay hashii xaamilada ahayd, isla goobtaas ayay ku umushay hashii.

Markii ay arkeen dhacdadaasi waxaa soo islaamay tiro yar, intii kale waxay ku madax-adaygeen gaalnimadoodii.

Nabi saalix wuxuu yiri: Hashani maalin bay biyo cabaysaa, idinkuna maalinta kale ayaad cabaysaan, ee ha isku taabanina, haddii kale cadaab baad kala kulmaysaan, hashii maalinteeda ayay cabi jirtay biyaha, maalinta kalena reer Thamuud ayaa ka cabi jiray ceelka magaalada, reerka Thamuud la dhaho waxay ahayd inay Alle rumeeyaan maadaama ay arkeen mucjiso aad u weyn, waxay jndhahooda saareen dhagixii oo hal kasoo baxaysa, laakiin indha-adayg, iyo kibir baa la degay.

Hashii oo la dilay

Dadkii degganaa tuulada, waxaa ku jiray sagaal qof oo ah kuwa ugu fasahaadka badan, waxaana kamid ahaa nin la dhihi jiray Qudaar ibnu saalif oo ahaa nin aad u liita, gaalnimadana meel fog ka gaaray.

Sagaalka nin iyo in badan oo kamid ahaa dadkii deegaanka waxay ku heshiiyeen in la dilo hasha, iyo nabi Saalix, maalin ayaa waxaa dhacday in Qudaar ibnu saalif uu gammuun ku dhuftay hashii, waxayna ku dhacday dhulka, halkaas ayay ku dileen hashii, waxaa la sheegaa in nirigta yar ay ku carartay dhagixii, Alle ayaa og.

Markii ay arrintani dhacday ayaa reer Thamuud waxay ku yiraahdeen Nabi saalix: Cadaabka aad noo ballanqaaday noo keen, haddii aad rasuul tahay.

Thamuud oo halaag u yimid

Galabtii kooxdii dilay hasha waxay damceen inay dilaan nabi Saalix calayhi salaam, balse Alle ayaa dhagaxaan u diray oo waxaa laga hormarsiiyay dadkii kale ee wali sugaya Cadaabka, Allaah ayaa u waxyooday nabi Saalix in Cadaabka uu imaan doonno saddex maalmood kaddib.

Waxaa billowday calaamadaha cadaabka, maalintii koowaad wajigooda wuxuu noqday midabka cagaarka, maalintii labaad wajigooda waa uu casaaday, maalintii seddexaad wajigooda wuxuu noqday madow, waxay garteen in Cadaabka uu jiro, waxay xirtern kafantooda, waxayna sugeen cadaabka, waxaa halmar la maqlay qaylo aad u gilgishay quluubtooda, halkaas ayayna ku dhigteen, maydadkooda ayaa buuxdhaafiyay dhulka iyaga oo aan dhaqaaq lahayn.

وَإِلَى ثَمُودَ أَخَاهُمْ صَالِحًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ قَدْ جَاءَتْكُمْ بَيِّنَةٌ مِنْ رَبِّكُمْ هَذِهِ نَاقَةُ اللَّهِ لَكُمْ آيَةً فَذَرُوهَا تَأْكُلْ فِي أَرْضِ اللَّهِ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوءٍ فَيَأْخُذَكُمْ عَذَابٌ أَلِيم ﴿﴾

Waxaannu u dirnay reer Thamuud walaalkooda Nabi Saalax wuxuuna yiri Qowmkaygiyow Alle caabuda wax kasoo haray Alle idinma sugnee Eebbe xaggii waxa idinka timid xujo cad Tanna waa heshii Eebbe waxay idin tahay calaamad ee iska daaya ha iska cunto dhulka Alle hana ku taabanina xumaan oo kolkaas idin qabato cadaab darran([6]).

---

[6]. Suuradda Acraaf

Wuxuu kaloo Eebbe yiri

فَعَقَرُوا النَّاقَةَ وَعَتَوْا عَنْ أَمْرِ رَبِّهِمْ وَقَالُوا يَا صَالِحُ ائْتِنَا بِمَا تَعِدُنَا إِنْ كُنْتَ مِنَ الْمُرْسَلِينَ (77) فَأَخَذَتْهُمُ الرَّجْفَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دَارِهِمْ جَاثِمِينَ (78) فَتَوَلَّى عَنْهُمْ وَقَالَ يَا قَوْمِ لَقَدْ أَبْلَغْتُكُمْ رِسَالَةَ رَبِّي وَنَصَحْتُ لَكُمْ وَلَكِنْ لَا تُحِبُّونَ النَّاصِحِينَ

Waxay dileen hashii waxayna ku madax adaygeen amarkii rabbigood waxayna dhaheen Saalixow noo keen waxaad noogu goodiyeyso haddaad tahay mid lasoo diray《》 Waxaa qabtay gariirkii waxayna ahaadeen kuwo guryahoodii ku dhintay《》 wuu ku jeestay (nabi Saalix) isagoo yiri tolkayow waan idin gaarsiiyey farriintii Rabbigay waana idin naseexeeyay mase jeclidiin naseexada([7]).

Maxaynu ka baran karnaa qisadani ?

▪ Cibaadada, iyo baryada waxay u sugnaatay Allaah oo kaliya.


▪ Nolosha oo lagu israafo waxay kamid ahayd sababihii halaagga qowmu Thamuud.

▪In laga jeesto amarka Alle iyo amarka rushsha waxay keenaysaa gaalnimo.

▪ Dadka fasahaadka iyo xumaha faafiya meel wanaagsan kuma dambayn doonaan.

---

[7]. Suuradda Acraaf


Qisadii Nabi Ibraahim/ ismaaciil CS

Nabi Ibraahim & Ismaaciil

Dadkii hore ee degganaa Baabil(ciraaq), jasiiradda carabta, iyo shaam waxay caabudi jireen sanamyada, meerayaasha I.W.M.

Nabi Ibraahim Calayhi salaam wuxuu kusoo barbaaray dhulkaasi, Allaah ayaa hanuuniyay, wuxuuna u doortay inuu noqdo rasuul iyo nabi.

Nabi Ibraahim wuxuu gudagalay inuu qowmkiisa ugu yeero inay caabudaan Allaah oo kaliya, oo ay ka tagaan sanamyada, iyo meerayaasha ay caabudayaan.

Wuxuu nabi Ibrahim isku dayay inuu xujada ku oogo qolada meerayaasha caabuda iyo sida ay u fekeraan, si ay u gartaan in hal ilaah oo kaliya oo ka jiro kawnkan, nabi Ibraahim wuxuu eegay samada, wuxuu arkay mid kamid ah meerayaasha, kolkaas buu yiri kani waa rabbigay, inyar kaddib meerihii wuu qarsoomay, kolkaas buu yiri kani ilaah ma aha,

Wuxuu markale arkay dayixii oo ifiyay mugdiga habeenka, kolkaasuu yiri waa kan rabbigay, haddana wuxuu yiri kani ilaah ma aha, waaberigii Waxaa soo baxday qorraxda, kolkaasuu nabi Ibraahim yiri: Waa kan rabbigay, qorraxda ayaa ka weyn kana iftiin badan dayaxa, iyo meerayaasha, intaasi wuxuu uga jeeday in uu tuso xujada ay ku andacoonayaan, fiidkii markii la gaaray qorraxdii ay gabbalkeeda dhacay, wayna qarsoontay.

Nabi Ibraahim Calayhi salaam wuxuu u sheegay kuwii caabudi jiray meerayaasha in Allaah uu yahay kan abuuray qorraxda, dayaxa, samadaha, iyo dhulka, sidoo kale Allaah subxaanah watacaalaa oo kaliya ayaa ah kan xaqa lagu caabudo, Alle ayaa ka weyn waxkasta, ma suulo, ma maqnaado, mana hurdo, sida ay ay u suusho dayaxa, u qarsoonto qorraxda, makhluuqaadkana u seexdaan.

Qowmkiisa ayaa la dooday si kasta ayuu isugu dayay inuu diinta ugu yeero, balse way ka madax adeegeen.

Burburintii sanamyada

Maalin maalmaha kamid ah ayaa nabi Ibraahim wuxuu u tegay qowmkiisa oo caabudaya asnaamta kolkaasuu u naseexeeyay, oo uu ku yiri:

Waxa aad caabudaysaan waa maxay?

Waxay yiraahdeen: Waa ilaahyadeenna, iyo ilaahyada aabbayaasheen.

Oo ma waxbay arkaan, misana maqlaan?

Waxay ku warceliyeen: Waa ilaahyadeenna.

Nabi Ibraahim wuxuu yiri: Allaha rabbiga caalamiinta ayaa ah mid xaq lagu caabudo, Allihii i abuuray ayaa igu hanuuniya wixii wanaagayga ku jira if iyo aakhiro, isaga ayaa i quudiya, haddaan xanuunsado isaga ayaa caafimaad i siiya, isaga ayaa i oofsada markay ajashaydu timaado, isaga ayaa dib nolosha iigu soo celinaya markii la gaaro xisaabta, Alle ayaan ka rajaynayaa inuu dembigayga dhaafo maalinta qiyaame.

Dadkii sanamyada caabudi jiray waxay ku adkaysteen falka ay ku jiraan, nabi Ibraahim wuxuu ku talogalay in uu burburiyo asnaamtaasi.

Maalin ciid u ahayd dadkii reer Baabil waxay aadeen magaalada dhinacyadeeda, waxayna nabi Ibraahim ku yiraahdeen: na soo raac, nabi Ibraahim baa ka cudurdaartay oo yiri: Waan xanuunsanahay.

Dadkii baa firaaqeeyay magaalada waxayna noqotay meel aan cidina joogin, nabi Ibraahim baa u dhaadhacay halkii ay sanamyadu ku jireen, wuxuuna ku burburiyay faas, markii uu dhulka dhigay sanamyadii, wuxuu soo reebay midka ugu weyn, faaskii ayuuna qoorta u suray.

Dadkii ka maqana markii ay yimaadeen way la amakaageen wixii lagu sameeyay sanamyada, waxay la sii fajaceen markii ay arkeen sanamkii weynaa oo qura inuu joogo isaguna faaska qoorta loo suray.

Nin dadkii goobta yimid kamid ahaa baa si xanaaq leh ku qeyliyay: Yaa sidan ku sameeyay ilaahyadeenna, cidda sidan samaysay waa cid xadgudubtay, waxay soo xusuusteen nabi Ibraahim oo horay u ballanqaaday in uu burburin doono asnaamtooda, markii ay u yeereen waxay ku yiraahdeen: Ma adigaa ayaa sidan sameeyay ibraahiimow?

Wuxuu ku jawaabay: midkan weyn baa sameeyay, inta uu farta ugu fiiqay sanamka weyn, ee weydiiya hadday hadlayaan.

Dib bay ugu laabteen sanamyadii ma hadlaan,ma cunaan, mana cabaan, sidaa ay tahayna ma aysan rumayn.

Nabi Ibraahim oo dab lagu tuuray

Markii uu nabi Ibraahim burburiyay sanamyadii, una sheegay qowmkiisa in asnaamtu aysan wax tarin, waxna dhibin, waxay ku adkaysteen sanamyadooda, waxayna ku talogaleen in nabi Ibraahim lagu tuuro dab holcaya.

Waxay yiraahdaan: Ha la gubo, oo ilaahyadiina u gargaara.

Waxay soo uruuriyeen xaabo tiro badan, wayna huriyeen ilaa ay karkarto, kaddib waxay keeneen nabi Ibraahim oo xarig ku xirxiran, waxayna ku tuureen dabkii holcayay, isaguna wuxuu yiri: Xasbiyallaahu wa nicmal wakiil.

Allaah Subxaanah watacaalaa ayaa u waxyooday dabkii oo ku yiri: Dabkoow u noqo Ibraahim qabow iyo nabadgalyo, nabi Ibraahim wax dhib ah ma uusan arag, wuxuuna ahaa mid iska tasbiixsada ilaa dabkii uu damay, wuxuuna kasoo baxay isagoo badqaba, waxaa gubtay oo kaliya xargihii isaga lagu xiray.

Nabi Ibraahim waxaa rumeeyay uun xaaskiisa Saara, iyo wiilka walaalkii dhalay ee Luud.

Nabi Ibraahim cs iyo Namruud

Namruud waxa uu ahaa boqor daalim ah oo gaal ah, waxa uu sheegan jiray ilaahnimo, waxaa u tegay oo dacwaddii u la tegay Nabi Ibraahim oo u sheegay in uu jiro hal ilaah, waana Allihii abuuray kownkan, samadaha iyo dhulalka.

Namruud baa wuxuu yiri: Waa kuma Rabbigaaga ibraahimoow?

Wuxuu nabi Ibraahim ku jawaabay: Rabbigay waa kan wax nooleeya, waxna dila.

Namruud waxa uu yiri: Aniguba waxbaan dilaa oo nooleeyaa. Kolkaas ayuu Namruud u wacay laba nin oo xabsiga ugu jiray, wuxuuna ku yiri: Mid ha la dilo, kan kale ha la iska fasaxo..

Nabi Ibraahim oo la yaaban caqliga yarida ninkan, waxa uu ku yiri : Ilaahey cadceedda ayuu bari kasoo bixiyaa, ee adigu galbeed ma ka keeni kartaa? Kolkaas ayuu wareeray Namruud, wax uu ku hadlo ayuu garan waayay.

Nabi Ibraahim oo ay la socoto xaaskiisa Saara waxay u soo ambabaxeen Masar si ay dadka ugu yeeraan xagga Alle. Masar waxaa xilligaa ka talinayay boqor damac badan oo xoog ku qabsada hablaha qurxoon, waxa uu isku dayay in uu ku soo dhowaado Saara oo ahayd xaaskii nabi Ibraahim, balse wuu ku dhici waayey aad ayuuna u baqay, waxa uu soo siiyay haddiyado farabadan iyo gabar Jaariyad ah oo la yiraahdo Haajar.

Nabi Ibraahim iyo sowjadiisa waxay kusoo laabteen Shaam, waqtigaasina Saara waxba umay dhalin nabi Ibraahim, waxay u hadyaysay Haajara si uu u guursado oo ay u dhasho durriyad, waqti badan kama soo wareegan Haajar waxay dhashay nabi ismaaciil Calayhi salaam.

Nabi Ibraahim oo loo bishaareeyay

Maalin maalmaha kamid ah waxaa nabi Ibraahim u yimid rag aad u labisan oo qurux loo dhammaystiray.

Nabi Ibraahim kolkii uu arkay martida u timid ayuu u keenay dibi buuran oo hilibkiisa la solay si ay u cunaan, waxaase layaab noqtay in raggii mid iyaga kamid ah uusan gacantiisa u soo dhiibin cuntada.

Nabi Ibraahim markii uu arkay arrinkaasi waxaa gashay cabsi, waxay raggii u sheegeen in ay yihiin Malaa'ig loo soo diray in ay soo halaagaan qowmkii Nabi Luud, Saara oo hadalkii dhagaysanaysa waxaa lagu yiri: Waxaan kuugu bishaaraynaynaa Wiil inaad dhasho, kolkaasay tiri: Aniga oo da'dan ah oo aan dhalin, odayguna duqoobay miyaan ilmo dhalaynaa?

Waxay malaa'igtii u sheegeen in ay bishaaradaasi xaq tahay oo xagga Allena ay ka socoto.

Saara waxay dhashay Isxaaq, nabi Ibraahim aad ayuu ugu farxay arrinkaasi.

Nabi Ibraahim waxa uu soo raray Haajar iyo wiilkeeda ismaaciil, isaga oo keenay meel aan biyo iyo baad toona lahayn, wuxuuna u sheegay in Allaah uu amray arrinkaasi, Haajar waxay tiri: Haddii uu Alle ku amray nama hoojinayo Alle weyne, nabi Ibraahim waa uu dhaqaajiyay.

Biyihii baa ka dhammaaday reerkii, xaaladdii way kasii dartay, Ismaaciil oo gaajo iyo harraad la ooynaya ayay garan weyday meel ay u la kacdo.

Alle weyne mucjisadiisu badanaa! Waxaa goobtii ka dilaacay meel biyo ka socdaan, Haajar ayaa tiri: Zam, Zam iyada oo ka baqaysa in biyaha ay ka dhammaadaan.

Muddo kaddib waxaa goobtii soo maray reer Geeddi ah oo biyo doon ahaa, waxay Haajar ka codsadeen in ay la soo degaan goobta wayna u oggolaatay.

Maalin maalmaha kamid ah nabi Ibraahim waxa uu soo booqday reerkii oo muddo ugu dambaysay, waxa uu arkay Ismaaciil oo weynaadey, si weyn ayuu ugu farxay arrinkaasi.

Nabi Ibraahim ayaa mar ku riyooday isaga oo qalaya wiilkiisa ismaaciil oo uu dhalay isaga oo da' ah, riyada ambiyada waa xaq iyo waxyi xagga Alle ka yimid, nabi Ibraahim waxa uu u hoggaansamay amarkii Rabbi, wuxuuna u sheegay wiilkiisa in la faray in uu qalo! Nabi ismaaciil ayaa aqbalay amarkii waalidkii, inta uusan birta la fuulin nabi Ibraahim waxaa laga la hadlay xagga Alle oo loo sheegay in uu ka dhabeeyay riyada, arrinkuna uu ahaa imtixaan uu Alle imtixaanay nabigiisa.

Nabi Ibraahim waxa uu arkay wan weyn oo loogu beddelay ismaaciil, aad bay u farxeen qoyskii nabi Ibraahim.

Dhisidda kacbada

Allaah Subxaanah watacaalaa Wuxuu u waxyooday nabi Ibraahim iyo wiilkiisa in ay dhisaan beytka Alle, waxay bilaabeen dhismaha iyaga oo ku ducaysanaya Rabbiyoow naga aqbal acmaasha wanaagsan, oo naga yeel kuwo adiga kuu hoggaansama oo ikhlaas la yimaada.

Markii ay dhiseen waxa nabi Ibraahim la faray in uu dadka ugu yeero xajka, wixii dad ah ee maqlay yeermadiisa waxay u yimaadeen xajka, ilaa maanta waa lq xajiyaa oo baytka Alle waa la yimaadaa.

Rabbi SWT mar uu ka warramay qisada dhexmartay nabi ibraahim iyo qowmkiisa waxa uu yiri:

وَلَقَدْ آتَيْنَا إِبْرَاهِيمَ رُشْدَهُ مِنْ قَبْلُ وَكُنَّا بِهِ عَالِمِينَ (51) إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِ مَا هَذِهِ التَّمَاثِيلُ الَّتِي أَنْتُمْ لَهَا عَاكِفُونَ (52) قَالُوا وَجَدْنَا آبَاءَنَا لَهَا عَابِدِينَ (53) قَالَ لَقَدْ كُنْتُمْ أَنْتُمْ وَآبَاؤُكُمْ فِي ضَلَالٍ مُبِينٍ (54) قَالُوا أَجِئْتَنَا بِالْحَقِّ أَمْ أَنْتَ مِنَ اللَّاعِبِينَ (55) قَالَ بَلْ رَبُّكُمْ رَبُّ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ الَّذِي فَطَرَهُنَّ وَأَنَا عَلَى ذَلِكُمْ مِنَ الشَّاهِدِينَ (56) وَتَاللَّهِ لَأَكِيدَنَّ أَصْنَامَكُمْ بَعْدَ أَنْ تُوَلُّوا

مُدْبِرِينَ (57) فَجَعَلَهُمْ جُذَاذًا إِلَّا كَبِيرًا لَهُمْ لَعَلَّهُمْ إِلَيْهِ يَرْجِعُونَ (58) قَالُوا مَنْ فَعَلَ هَذَا بِآلِهَتِنَا إِنَّهُ لَمِنَ الظَّالِمِينَ (59) قَالُوا سَمِعْنَا فَتًى يَذْكُرُهُمْ يُقَالُ لَهُ إِبْرَاهِيمُ (60) قَالُوا فَأْتُوا بِهِ عَلَى أَعْيُنِ النَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَشْهَدُونَ (61) قَالُوا أَأَنْتَ فَعَلْتَ هَذَا بِآلِهَتِنَا يَا إِبْرَاهِيمُ (62) قَالَ بَلْ فَعَلَهُ كَبِيرُهُمْ هَذَا فَاسْأَلُوهُمْ إِنْ كَانُوا يَنْطِقُونَ (63) فَرَجَعُوا إِلَى أَنْفُسِهِمْ فَقَالُوا إِنَّكُمْ أَنْتُمُ الظَّالِمُونَ (64) ثُمَّ نُكِسُوا عَلَى رُءُوسِهِمْ لَقَدْ عَلِمْتَ مَا هَؤُلَاءِ يَنْطِقُونَ (65) قَالَ أَفَتَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ مَا لَا يَنْفَعُكُمْ شَيْئًا وَلَا يَضُرُّكُمْ (66) أُفٍّ لَكُمْ وَلِمَا تَعْبُدُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ أَفَلَا تَعْقِلُونَ (67) قَالُوا حَرِّقُوهُ وَانْصُرُوا آلِهَتَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ فَاعِلِينَ (68) قُلْنَا يَا نَارُ كُونِي بَرْدًا وَسَلَامًا عَلَى إِبْرَاهِيمَ (69) وَأَرَادُوا بِهِ كَيْدًا فَجَعَلْنَاهُمُ الْأَخْسَرِينَ (70) وَنَجَّيْنَاهُ وَلُوطًا إِلَى الْأَرْضِ الَّتِي بَارَكْنَا فِيهَا لِلْعَالَمِينَ (71) وَوَهَبْنَا لَهُ إِسْحَاقَ وَيَعْقُوبَ نَافِلَةً وَكُلًّا جَعَلْنَا صَالِحِينَ (72)

Dhab ahaan waxaanu siinay nabi ibraahim hanuunkiisa marhore annagaana ogayn《》 markii uu ku yiri aabbihii iyo qowmkiisa waa maxay sawiradan(taalooyinkan) aad idinku dulfadhidaan《》 waxay yiraahdeen aabbayaasheena ayaanu helnay iyagoo caabudaya《》 wuxuu ku yiri waxaad ahaateen idinka iyo aabbayaashiinba baadi cad《》waxay yiraahdeen ma waxaad noola timid xaq mise adigu waxaad kamid tahay kuwa ciyaaraya《》 wuxuu ku yiri rabbigiin waa rabbiga samooyinka iyo dhulka ee ah kan abuuray aniguna arrinkaasi markhaati baan ka ahay《》 iaahey baan ku dhaartaye waan shirqooli doonaa sannamyadiina kaddib markaad jeesataan idinkoo tagi《》 wuxuuna ka yeellay burbur kooda weyn mooyee waxay u dhowyihiin inay isaga u soo laabtaan《》 waxay dhaheen yaa ku falay ilaahyadeennii kaasi waxa uu kamid yahay daalimiintee《》 waxay dhaheen waxaan maqalnay nin dhallinyaro ah oo hadalhaya oo ibraahim la yiraahdo《》 waxay dhaheen bal dadka hortooda keena si ay uga markhaati kacaan《》 waxay dhaheen ma adigaa sidan ku sameeyay sanamyaashayda kbraahimow《》 wuxuu yiri ka kaalay intaan sameeyay waxaa falay kooda weyn bal weydiiya hadday hadlayaan《》 markaasay dib ugu noqdeen naftooda waxayna isu dhaheen war idinkaa daalimiin ah《》 kaddib madaxaa loo rogay waxayna dhaheen dhab baad u ogtahay in aanay kuwani hadlayn《》 wuxuu yiri ma waxaad caabudaan Eebbe sokadii waxaan waxba idin tarayn waxbana idin dhibayn《》 Uf baa la idin yiri idinka iyo waxaad caabudaysaan Eebbe sokadii miyaydaan caqli lahayn《》 markaasay yiraahdeen Guba oo ilaahyadiina u hiiliya haddaad samaynaysaan ku dhaqsada《》 ilaahey wuxuu yiri waxaannu nidhi naaray u noqo qabow iyo badbaado ibraahim《》 waxay la dooneen dhagar waxaannu ka yeelnay kuwo khasaaray([8]).

Sidoo kale Alle SWT mar uu ka warramayay Qisadii nabi ibraahim iyo wiilkiisa Ismaaciil waxa ui yiri:

فَبَشَّرْنَاهُ بِغُلَامٍ حَلِيمٍ (101) فَلَمَّا بَلَغَ مَعَهُ السَّعْيَ قَالَ يَا بُنَيَّ إِنِّي أَرَى فِي الْمَنَامِ أَنِّي أَذْبَحُكَ فَانْظُرْ مَاذَا تَرَى قَالَ يَا أَبَتِ افْعَلْ مَا تُؤْمَرُ سَتَجِدُنِي إِنْ شَاءَ اللَّهُ مِنَ الصَّابِرِينَ (102) فَلَمَّا أَسْلَمَا وَتَلَّهُ لِلْجَبِينِ (103) وَنَادَيْنَاهُ أَنْ يَا إِبْرَاهِيمُ (104) قَدْ صَدَّقْتَ الرُّؤْيَا إِنَّا كَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ (105) إِنَّ هَذَا لَهُوَ الْبَلَاءُ الْمُبِينُ (106) وَفَدَيْنَاهُ بِذِبْحٍ عَظِيمٍ (107) وَتَرَكْنَا عَلَيْهِ فِي الْآخِرِينَ (108) سَلَامٌ عَلَى إِبْرَاهِيمَ (109) كَذَلِكَ نَجْزِي الْمُحْسِنِينَ (110) إِنَّهُ مِنْ عِبَادِنَا الْمُؤْمِنِينَ (111) وَبَشَّرْنَاهُ بِإِسْحَاقَ نَبِيًّا مِنَ الصَّالِحِينَ (112) وَبَارَكْنَا عَلَيْهِ وَعَلَى إِسْحَاقَ وَمِنْ ذُرِّيَّتِهِمَا مُحْسِنٌ وَظَالِمٌ لِنَفْسِهِ مبين.

Waxaan ugu bishaaraynay nabi ibraahim wiil dabeeco san《》 markuu ku gaaray agtiisa socod wuxuu ku yiri wiilkaygow waxaan hurdada ku arkay anoo ku gowracaya ee eeg waxaad fali wuxuu yiri aabbow samee waxa lagu faray waxaad i heli Eebbe idankii inaan kamid noqdo kuwa samree《》 markay isdhiibeen dhafoorkana u jiifiyay ayaannu u dhawaaqnay ibraahiimow 《》dhab ahaan manaamkii waad ka dhabaysay sidaasana ku abaalmarinaa samafalayaasha《》 kani waa imtixaan muuqda oo weyn《》 waxaannu ku furannay(gowrac) wan weyn 《》 waxaanna kaga tagnay kuwa dambe《》 nabadgalyo nabi ibraahim dushiisa ha ahaato《》 sidaas ayaana ku abaalmarinaa samafalayaasha《》 wuxuu ka mid ahaa adoomadanada mu'miniinta ah《》 waxaan ugu bishaaraynay isxaaq oo nabi iyo kuwa suubanba ah《》 waanu barakaynay ibraahim iyo isxaaqba waxaana kamid ah faracooda mid samafale ah iyo mid naftiisa ku gardarooda oo caddaysta([9]).

---

[8]. Suuradda Al anbiyaa'.

[9]. Suuradda Saafaat.

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Waa waajib in la adeeco Allaah oo amarkiisana la fuliyo, wax kastana loo huro.

2. In caruurta lagu rabbeeyo in ay maqlaan hadalka waalidkooda.


3. Sabarku waa furaha farajka.

4. Hooyadu kaalin ayay ku leedahay tarbiyeynta caruurta.

5. Qoyska muslimka ah wuxuu iska kaashadaa wanaagga.

6. Qaddarinta iyo ixtiraamka waa astaan nabiyadu ay lahaayeen.

7. Ilaahey sw waxa uu nabiyadiisa la soo diraa mucjisooyin.


Qisadii Nabi Luud CS

Nabi Luud

Markii ay mushrikiintii dabka ku tuureen nabi Ibraahim, ilaaheyna dabkii ka dhigay qabow iyo ammaan, waxaa nabi Ibraahim rumeeyay Luud calayhi salaam, oo ahaa wiil uu dhalay nabi Ibraahim walaalkiisa, wuxuuna ugu beegnaa wiilkiisa oo kale.

Nabi Ibraahim wuxuu la hijrooday Luud, waxayna qabteen dhulka shaam, kaddib Alle ayaa u waxyooday in uu tago tuulo u falastiin ka tirsan, waxaa ku noolaa dad la sheego inay ahaayeen kuwii ugu faajirsanaa bulshada, waxay ahaayeen gaalo, isbaaradana way dhigan jireen, waxay samayn jireen faaxisho tii ugu xumayd ee insaan sameeyo, waxay u tagi jireen ragga oo ay hunguri ka raadin jiray, falalkaas xun oo aan hortood ka dhicin dunida, waxaa u dheeraa hawlo foolxun, munkar iyo dhaqan liita oo ay shaqo ka dhigteen.

Nabi Luud calayhi salaam ayaa wacdiyay oo ku yiri: Ma faaxisho aan hortiin la samayn baad falaysaan, ma waxaad hunguri ka raadinaysaan ragga, iyadoo ilaahey idinku talogalay dumar, waxaad yihiin dad xadgudbay, oo caqliga saliimka ah ee basharka ka baxay.

Waxay yiraahdeen: Luud iyo ehelkiisa tuulada ha laga saaro, waa dad daahir ahe, kuma noolaan karaan meeshan.

Nabi Luud calayhi salaam kama quusan in uu xagga Alle ugu yeero, iyo in markasta tawbadu ay furantahay, wuxuu ku waanin jiray inay macsida ka tagaan, balse waxaan jeesjees iyo qosol ahayn kalama kulmin, wayna ka jeesteen in ay Allaah u soo laabtaan, cadaabka iyo Halaagga Alle ayaa u yimid.

Malaa'igtii samada kasoo degatay

Malaa'igtu intii aysan nabi Luud u tegin waxay sii mareen nabi Ibraahim, wuxuuna u qalay dibi aad u weyn, balse malaa'igtii baa u sheegtay in loo diray xagga iyo Luud, waxay u yimaadeen nabi Luud iyaga oo quruxdooda bannaanka taallo, markii uu arkay nabi Luud wuxuu dareemay murugo, sababtoo ah dadkan sidan u qurxoon ee u soo martiyay waxaa soo damci kara dadkii falalka xun wadwaday, sidii ayaana dhacday dadkii oo farxadi ka muuqato waxay soo buuxdhaafiyeen gurigii nabiga dhiniciisa, waxay bilaabeen inay iridda soo riixaan, nabi luudna dhinaca ka sii riixo si aysan u soo galin, balse waxay soo jebiyeen albaabka, nabi Luud baa ku yiri: Dadkani waa martiday, ha igu fadeexaynina, mid maan leh miyuusan idinku jirin, malaa'ikta

waxay u sheegeen nabi Luud in Allaah uu soo diray, dadkaana dhawaan la halaagi doono, oo aysan waxba u geysan karin iyaga, dadkii sidii iridda u buuxay halmar baa malakul jibriil garabkiisa ku dhuftay, indhaha ayay wada beeleen gebigood.

.kaddib Allaah ayaa faray nabi Luud in isaga iyo ehelkiisa ay isaga rawaxaan tuulada inta aannu waagu baryin, marka laga reebo xaaskiisa oo ahayd kaafirad la dhacsanayd dhaqankii magaalada, waxaana loo sheegay in islaantaasina cadaabka uu haleeli doono.

Nabi Luud ayaa soo guureeyay inta aan la gaarin fajarka, tuuladiina wuu ka fogaaday.

Halaaggii oo soo degay

Allaah Subxaanah watacaalaa, wuxuu u diray tuuladaasi malakul jibriil, wuxuuna sare u qaaday tuulada oo idil, kaddib kor ayuu la tegay, wuxuu la gediyay dadkii ku noolaa, meeshii koraysay waxay martay hoos, meeshii hoosena sare ayay martay,

Kaddib waxaa lagu soo daadiyay dhagaxaan ka samaysan dhoobo adag..

Taasina waxay abaalgud u ahayd gaalnimadooda, iyo macaasidii ay fali jireen.

Qisada nabi Luud meelo badan ayaa lagaga hadlay Quraanka, waxaana kamid ah suuradda Ash-shucaraa' oo Alle weyne SWT ku yiri:

كَذَّبَتْ قَوْمُ لُوطٍ الْمُرْسَلِينَ (160) إِذْ قَالَ لَهُمْ أَخُوهُمْ لُوطٌ أَلَا تَتَّقُونَ (161) إِنِّي لَكُمْ رَسُولٌ أَمِينٌ (162) فَاتَّقُوا اللَّهَ وَأَطِيعُونِ (163) وَمَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مِنْ أَجْرٍ إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى رَبِّ الْعَالَمِينَ (164) أَتَأْتُونَ الذُّكْرَانَ مِنَ الْعَالَمِينَ (165) وَتَذَرُونَ مَا خَلَقَ لَكُمْ رَبُّكُمْ مِنْ أَزْوَاجِكُمْ بَلْ أَنْتُمْ قَوْمٌ عَادُونَ (166) قَالُوا لَئِنْ لَمْ تَنْتَهِ يَا لُوطُ لَتَكُونَنَّ مِنَ الْمُخْرَجِينَ (167) قَالَ إِنِّي لِعَمَلِكُمْ مِنَ الْقَالِينَ (168) رَبِّ نَجِّنِي وَأَهْلِي مِمَّا يَعْمَلُونَ (169) فَنَجَّيْنَاهُ وَأَهْلَهُ أَجْمَعِينَ (170) إِلَّا عَجُوزًا فِي الْغَابِرِينَ (171) ثُمَّ دَمَّرْنَا الْآخَرِينَ (172) وَأَمْطَرْنَا عَلَيْهِمْ مَطَرًا فَسَاءَ مَطَرُ الْمُنْذَرِينَ (173) إِنَّ فِي ذَلِكَ لَآيَةً وَمَا كَانَ أَكْثَرُهُمْ مُؤْمِنِينَ .

Reer Luud waxay beeniyeen rusushii loo diray《》 markii uu yiri walaalkood Luud miyaydaan Alle ka baqayn《》 Waxaan idin ahay rasuul aamin ah《》Ka dhowrsada eebbe ina adeeca《》 idinkama warsanaayo xaqa ujuuro, ajirkayga Eebbaha caalamka ayaan ka sugi《》 miyaad u tagaysaan kuwa labka ah ee dadka amid ah 《》 oo miyaad ka tegaysaan wixii Eebbe idin abuuray oo haweenkiina ah, waxaad tihiin qolyo talaabay oo xadgudbay《》 waxay dhaheen hadaanad joogin Luudow waxaad noqon doontaa kuwa la saaro (masaafuriyo) 《》 wuxuu yiri anigu camalkiina ayaan ka xumahay oo aan ka caraysanahay《》 Rabbiyow iga kori aniga iyo ehelkayga waxay falayaan(cuqubada imaan doonta)《》 Waana ka korinay isaga iyo ehelkiisa dhammaantood 《》Habar

kuwa cadaabka ku hadhay mooyee《》 Kuwii soo haraynay waan halaagnay《》 waxaan kusoo daynay roob (dhagax naar ah) waxaana u liitay kuwii loo digay《》 Taasina waxaa ku sugan calaamad lagu cibro qaato, badankooduna ma aha kuwo rumeeya([10]).

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

▪Macsida iyo dunuubtu waxay sabab u yihiin cadaabka Alle, iyo ciqaabtiisa.

▪Alle Subxaanah watacaalaa waxa uu ilaaliyaa addoomadiisa wanaagsan.

▪Insaanka marka uu ka tago xishoodka, waxa uu ka hoos maraa darajada xayawaannimo.

---

[10]. Suuradda Shucaraa

Nabi Isxaaq iyo Yacquub

Nabi Isxaaq iyo Yacquub

Nabi Ibraahim Calayhi salaam markii uu da' gaaray, xaaskiisa saarana ay da'da ka dabatimid, welina aanay caruur u dhalin nabi Ibraahim, ayaa Allaah ugu bishaareeyay in Saara ay dhali doonto wiil la yiraahdo Isxaaq.

Nabi Isxaaq cariurtii uu dhalay waxaa kamid ahaa Yacquub.

Nabi Yacquub waxa uu aabbe u ahaa 12 caruur ah, waxaa loo yaqaanaa magaca Israa'iil, iyo in uu yahay aabbaha reer bani israa'iil, Yuusuf iyo Binyaamiin ayaa isku hooyo ahaa, aabbahooda aad ayuu u jeclaa labadooda gaar ahaan Yuusuf oo la sheego in uu wiilasha kale ka jeclaa, maalin baa waxaa dhacday in Sheydaan uu xasad ku rido qalbiyada wiilashii la dhashay Yuusuf, waxayna go'aansadeen in ay ku ridaan ceel.

Nabi Yacquub aad ayuu uga murgooday in uu waayo wiilkiisa, muddo kaddib waxaa dib u midoobay Yacquub iyo Yuusuf oo boqor noqday waqtigaasi, waxayna ku noolaayeen nolol iska wanaagsan.

Geeridii Nabi Yacquub

Nabi Yacquub kolkii uu dareemay in uu macsalaamaynayo dunida ayuu isugu yeeray wiilashiisa oo uu ku yiri: Markaan geeriyoodo maxaad caabudi doontaan?

Waxay ku jawaabeen: Allahaaga iyo Allihii ay caabudi jiraan aabbayaashada oo ah Alle weyne Subxaanah watacaalaa ayaan caabudaynaa, isaga ayaana u hoggaansamaynaa.

Allaah SWT waxa uu yiri:

وَلَقَدْ جَاءَتْ رُسُلُنَا إِبْرَاهِيمَ بِالْبُشْرَى قَالُوا سَلَامًا قَالَ سَلَامٌ فَمَا لَبِثَ أَنْ جَاءَ بِعِجْلٍ حَنِيذٍ (69) فَلَمَّا رَأَى أَيْدِيَهُمْ لَا تَصِلُ إِلَيْهِ نَكِرَهُمْ وَأَوْجَسَ مِنْهُمْ خِيفَةً قَالُوا لَا تَخَفْ إِنَّا أُرْسِلْنَا إِلَى قَوْمِ لُوطٍ (70) وَامْرَأَتُهُ قَائِمَةٌ فَضَحِكَتْ فَبَشَّرْنَاهَا بِإِسْحَاقَ وَمِنْ وَرَاءِ إِسْحَاقَ يَعْقُوبَ (71) قَالَتْ يَا وَيْلَتَى أَأَلِدُ وَأَنَا عَجُوزٌ وَهَذَا بَعْلِي شَيْخًا إِنَّ هَذَا لَشَيْءٌ عَجِيبٌ (72) قَالُوا أَتَعْجَبِينَ مِنْ أَمْرِ اللَّهِ رَحْمَتُ اللَّهِ وَبَرَكَاتُهُ عَلَيْكُمْ أَهْلَ الْبَيْتِ إِنَّهُ حَمِيدٌ مَجِيد.

Waxay u la yimaadeen malaa'igta nabi ibraahim bishaaro waxayna dhaheen Nabadgalyo isagiina nabadgalyo dushiina ha ahaato ayuu yiri masii jooginba in uu u keenay dibi shilis oo lasoo shiilay 《》 markuu arkay in ayna gacmahoodu gaarayn hilibka wuu diday cabsina laabta ku qabsaday waxay yiraahdeen ha cabsan waxaa naloo soo diray qowmka Luud 《》 haweeneydiisiina wayba taagantahay waabay qososhay waxaanu ugu

bishaaraynay nabi isxaaq oo kasii farcami doona Yacquub《》islaantii waxay tiri hoogaygii ma waxaan dhali doonaa anoo da' ah odaygeygaan da'da ah waa arrin la yaab leh《》 malaa'igtii waxay dhaheen ma waxaad la yaabaysaa arrinka ilaahey, Eebbe naxariistiisa iyo barakadiisa dushiina ha ahaato reerka guriganow Eebbena waa la mahdiye sharfan([11]).

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Waalidka in la adeeco amarkoodana la fuliyo waa waajib.

2. In Alle la talosaarto oo aan la quusan ayaan ka baran Karnaa qisadani.

3. In loo sabro imtixaanka adduun waxaa lagu helayaa darajo aakhiro.

4. Dardaaran habboon waa in la siiyaa ubadka markasta.

---

[11]. Suuradda Huud.

Qisadii Nabi Yuusuf

Nabi Yuusuf

Nabi Ibraahim wiilashiisa waxaa kamid ahaa Ismaaciil oo ay ku abtirsadaan reer Qureysh, sidoo kale nabi Isxaaq waxa uu dhalay nabi Yacquub Calayhi salaam.

Nabi Yacquub waxa uu dhalay 12 caruur ah oo ay ugu yaryihiin Yuusuf iyo Binyaamiin oo nabi Yacquub aad u jeclaa, waxa uuna nabi Yacquub dareemi jiray in Yuusuf uu leeyahay Arrimo la yaab leh.

Maalin maalmaha kamid ah Yuusuf oo da'yar ahaa ayaa ku riyooday riyo weyn oo cajiib ah, waxa uu arkay in 11 meere, qorraxda iyo dayaxa ay isaga u suujadayaan.

Waxa uu riyadii u sheegay aabbihii Yacquub.

Yacquub oo gartay in riyadu ay tahay mid weyn ayaa wiilkiisa kula taliyey in uusan la wadaagin walaalihiisa, sababtuna waxay ahayd in Yacquub uu dareemaya in wiilasha kale ay xiqdi u qabeen.

Maalin waxaa dhacday in wiilashii ay shiraan, waxaa shirka joogay 10 wiil, waxaa maqnaa Yuusuf iyo walaalkiisa Binyaamiin oo iyaga loo tashanayay.

Shirka waxaa looga arrinsanayay sidii laga yeeli lahaa Yuusuf iyo Binyaamiin oo aad looga jecelyahay guriga.

Qaar baa soo jeediyay in la dilo Yuusuf ama lagu tuuro dhul fog oo aan laga yaabin in dib dambe loo arko.

Wiilka weyn ayaa soo jeediyay in aan la dilin Yuusuf oo lagu rido ceel si ay u qaataan dadka safraya ee ganacsatada ah, ra'yigaas ayaana la isla qaatay.

Wiilashiisa baa Yacquub ku yiri: Aabbe Yuusuf na raaci oo ha nala ciyaaro innaga ayaa ilaalinayna, waana ka oggolaaday nabi Yacquub isaga oo kula dardaarantay in ay daryeelaan walaalkooda oo ay ilaaliyaan.

Markii la soo baxay ayaa lagu riday Yuusuf ceelkii, waxaana halkii soo maray niman socoto ah oo ganacsi wata, kolkii ay wadaantii ku soo rideen ceelkii waxaa qabsaday nabi Yuusuf oo

bannaanka loo soo saaray markiiba, nimankii waxay ku iibiyeen nabi Yuusuf lacag yar oo aan badnayn.

Walaalihii nabi Yuusuf waxay qaleen ri' yar, waxayna dhiiggeeda marmariyeen khamiiskii nabi Yuusuf, waxay ku laabteen aabbahooda iyaga oo barooranaya, waxay u sheegeen in dhurwaa uu cunay wiilkiisa Yuusuf.

Nabi Yacquub baa isweydiiyay sababta uu waraabuhu u jeexi waayey Khamiiska nabi Yuusuf isagoona u caddaatay in wiilasha ay arrin kale ku dhaqaaqeen, waxa uu sheegay in uu sabrayo oo uu Alle talosaartay.

Nabi Yuusuf iyo Imtixaankii weynaa

Nabi Yuusuf waxa uu noqday addoon la iibsaday kolkii laga soo saaray ceelka, waxaa iibsaday wasiirka ugu weyn wasiiradda Masar.

Waxa uu wasiirkii la dardaarmay xaaskiisa oo uu u sheegay in ay xanaanayso wiilka yar laga yaabee in uu ubad u noqdo.

Nabi Yuusuf gurigaas ayuu ku weynaadey isaga oo ku jiray nolol iska roon, waxaase imtixaan noqotay xaaskii wasiirka oo caashaqday Yuusuf, waxayna isku dayday in ay naftiisa ka doonato, waxay qurxiday guriga iyo furaashyadii yaallay, waxayna xirtay albaabyadii guriga, waxayna ku amartay Yuusuf in uu dhankeeda u soo dhaqaaqo!

Nabi Yuusuf ayaa ku jawaabay: Ilaahey baan ka magan-galay in aan xumaan ku kaco, ilaahey baa xumaan ka nasahan.

Waxay isku dayday in ay xoog ku soo qabato Yuusuf ilaa ay jeexday Khamiiska isaguna uu ka cararayo oo leh: odaygaagu wuu i sharfay, oo wuu i karaameeyay, wuxuu igu aaminay reerkiisa, sidee baan u khiyaameeyaa.

Waxaa markiiba iridda soo istaagay wasiirkii oo uu la socday ina adeerka gabadha uu qabay, kolkaas ayay akhriday wixii been ahaa, waxay sheegtay in Yuusuf uu isku dayay in uu wax u dhimo sharafkeeda, Yuusuf ayaa isaguna isku difaacay in iyadu ay isku dayday in ay xumo samayso.

Ninkii ina adeerka gabadha ahaa baa soo jeediyay in la eego Khamiiska Yuusuf, haddii uu hore ka jeexmay ay gabadhu run sheegayso, haddii uu gadaal ka jeexmayna Yuusuf uu yahay ninka runta sheegaya.

Markii la arkay in Khamiiska uu gadaal ka jeexmay baa la ogaaday in gabadhu ay khaldantahay.

Nabi Yuusuf oo xabsi galay

Waxaa magaalada si xawli ah ugu faafay wark sheegaya in xaaska wasiirka ay damacday addoon yar oo gurigeeda jooga, haweeneydii wasiirka qabay oo la oran jiray Suleykha ayaa arrinkii ka warheshay waxayna go'aansatay in ay Haweenka kale martisoorto si ay u tusto quruxda Yuusuf.

Haweenkii la martisooray waxay aad u la yaabeen quruxda Yuusuf, waxay yiraahdeen: Kani bashar ma aha ee waa malag kariim ah. Islaantii boqorku qabay ayaa tiri haddii uu san amarkayga fulin xabsi ayaan dhigayaa.

Nabi Yuusuf baa yiri: Rabbiyoow xabsiga ayaa la ii qaatay intaan xumaan ku dhici lahaa, adduun iyo aakhirana aan halaagsami lahaa.

Nabi Yuusuf ayaa xabsiga la dhigay isaga oo aan waxba galabsan, waxa uu ahaa qof aad u cibaado badan.

Waxaa xabsiga kula jiray laba nin oo lagu soo eedeeyay in ay sumeyn rabeen boqorka, habeenka markii la seexday ayaa labadii nin mid kasta waxa uu arkay riyo uu la tacajubay, waxayna u sheegeen riyooyinkii nabi Yuusuf oo u fasiray labadii nin, mid kamid ah labada nin ayuu u tilmaamay in uu xabsiga ka bixi doono oo la saamixi doono, wuxuu ku yiri: Marka baxdo waxaad boqorka u sheegaa in uu jiro nin la dulmiyay oo Yuusuf la yiraahdo xabsigana dulmi ugu jira. Ninkii markii la sii daayay ayuu ilaaway Yuusuf, muddo sannado ah ayuuna xabsiga ku sii jiray nabi Yuusuf.

Muddo kaddib ninkii masar ka talinayay baa wuxuu yiri: Waxaan riyo ku arkayaa toddobo neef oo lo' ah oo shilshilis oo ay cunayaan toddobo wayd ah, toddobo sabuul oo cagaaran iyo toddobo sabuul oo qallalan, madaxyaweyntan i agfadhidow iiga warrama riyadan haddaad wax ka garanaysaan fasiraadda riyooyinka.

Dadkii ku ku dhowaa baa yiri: Waa riyo isku dhexjirta oo aan la garanayn waxay tahay.

Kolkaas baa labadii nin ee xabsiga kula jiray nabi Yuusuf kii badbaaday soo xusuustay muddo dheer kaddib nabi Yuusuf, wuxuuna ninkaa codsaday in loo diro Yuusuf oo ah nin yaqaana fasiraadda riyooyinka.

Markii loo yimid nabi Yuusuf waxa uu si cajiib ah u sharraxay riyadii iyo waxa loo la jeedo.

Ninkii talinayay baa aad u la dhacay fasiraadda nabi Yuusuf ee riyada, wuxuuna amray in xabsiga laga soo daayo, qof baa loo diray in uu xabsiga kasoo daayo nabi Yuusuf, nabi Yuusuf markii loo tegay waxa uu diiday in uu soo baxo ilaa laga cadeeyo in uu bari ka yahay dhammaan eedihii lagu been abuurtay.

Waxaa lasoo shiriyay haweenkii kolkaas baa la weydiiyay arrinta Yuusuf, waxayna ku jawaabeen in aysan wax xun ku ogayn Yuusuf, iyo in uu yahay nin dhowrsoon.

Markaas waxaa hadashay xaaskii hoggaamiyaha Masar oo daaha ka qaaday in ay iyadu xumaha wadday, Yuusufna uu ahaa nin runta ka hadla.

Xaakimkii Masar waxa uu yiri: Yuusufow maanta laga bilaabo waxaad kamid tahay dadka qasriga warkooda laga dhegaysto, xil ilaale xilka aad doontana waa laguu dhiibi.

Nabi Yuusuf Calayhi salaam waxa uu sheegay in laga dhigo mas'uulka khasnadaha masar, si uu ugu diyaargaroobo kaydna loogu helo abaaraha markasta dhaca.

Nabi Yuusuf oo gartay walaalladiisa

Waxaa la sheegay in gaajo iyo abaari ay ka dhacday Masar, Shaam, iyo meelaha ku wareegsan, nabi Yuusuf walaaladiisa ayaa kamid ahaa dadkii ay saamaynta ku yeelatay gaajadii jirtay. Waxaa laga yimid meelo badan si wax uun looga qaato cuntadii ay kaydsatay Masar.

Waxaa yimid walaaladii nabi Yuusuf oo wada badeecad ay ku bedeshaan cunto, waxayna u soo galeen nabi Yuusuf oo xilligaasi noqday xaakimka ugu sarreeya Masar, iyagu ma aysan garan, balse isaga wuu gartay, waxa uu wax ka weydiiyay reerkooda, walaalkooda la waayey, iyo Binyaamiin oo Yuusuf isku bah ahaayeen.

Nabi Yuusuf wuxuu shardi uga dhigay in ay keenaan walaalkooda Binyaamiin haddii ay doonayaan raashiin.

Markii ku laabteen aabbahooda oo ay u sheegeen in walaalkooda loo soo diray ayuu ka labalabeeyay in uu ku daro, isaga oo maanka ku haya wixii ku dhacay Yuusuf.

Kolkii dambe waa uu la diray, waxayna soo galeen Masar.

Nabi Yuusuf oo ah xaakimka ka taliya Masar waxa uu degay xeelad uu kaga reebto walaalkiisa yar, wuuna ku guuleystay.

Walaaladii nabi Yuusuf markii ay waayeen walaalkooda Binyaamiin aad ayay ugu murgoodeen, aabbahooda Yacquub aad ayuu u dhibsaday arrinkaa, araggiisa ayuu ku waayey sidii uu u la murugsanaa nabi Yuusuf, wiilashiisa ayuu ku yiri: Ha ka quusanina naxriista Alle, ha la baadigoobo Yuusuf iyo walaalkiisa, waa ay noolyihiine.

Nabi Yuusuf walaaladiisa ayaa ku soo laabtay Masar iyaga oo sita badeecad yar, waxay ka codsadeen xaakimka (Nabi Yuusuf) in uu siiyo raashiin oo uu ku saddaqaysto.

Nabi Yuusuf waxa uu ku yiri: Ma ogtihiin wixii aad ku samayseen Yuusuf iyo walaalkii markii aad jahliga idinku jiray? Waxay ku dhaheen oo adigu ma Yuusuf baad ahayd? Wuxuu ku yiri: Waxaan ahay Yuusuf, kanina waa walaalkey, Alle ayaa nagu mannaystay wanaag, ninkii sabra oo dhowrsada Alle ayaa ka abaalmarinaya.

Waxay yiraahdeen: Eebbe wuu naga kaa fadilay Yuusufow, khalad baan kaa galnay annaguna.

Waxa uu nabi Yuusuf ku yiri: Waxba idinma haysto walaalayaal, Sheydaan baa dhexdeena galay, Alle debigeenna ha dhaafo dhammaantayada.

Waxa uu nabi Yuusuf u sheegay walaaladiisa in ay qaadaan khamiiskiisa, kuna tuuraan wejiga aabbe arragiisa ayaa u soo laabanaya, reerka oo idilna Masar ha la iigu keeno.

Markii ay u dhaqaaqeen reer Yacquub dhanka Masar, waxa uu Yacquub: Waxaan helayaa carafta Yuusuf, markii arragiisa uu helay ayay ku yiraahdeen: Aabbe dembidhaaf noo weydii waynu khaladannaye.

Nabi Yuusuf iyo wasiiradii ugu sarreeyay ee Masar ayaa soo dhaweeyey qoyska, waxa uu nabi Yuusuf yiri: Aabbe tani waa fasiraadda riyadayda markii aan yaraa ku riyooday, Eebbe ayaa mahad u sugnaatay idinka keenay miyiga, anigana jeelka iga soo saaray.

{Rabbiyoow waxaad i siisay xukun, waxaadna i bartay fasiraadda riyooyinka, abuuraha samadaha iyo dhulkow, adaa weli ii ah adduun iyo aakhiro, i oofso anoo Muslim ah ina haleeshii kuwa wanaagsan}.

Qisada nabi Yuusuf suurad dhan ayaa kusoo aroortay Qur'aanka kariimka ah, Alaah SWT isaga oo inoo sheegaya muhiimadda qisada nabi Yuusuf waxa uu yiri:

نَحْنُ نَقُصُّ عَلَيْكَ أَحْسَنَ الْقَصَصِ بِمَا أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ هَذَا الْقُرْآنَ وَإِنْ كُنْتَ مِنْ قَبْلِهِ لَمِنَ الْغَافِلِينَ (3) إِذْ قَالَ يُوسُفُ لِأَبِيهِ يَا أَبَتِ إِنِّي رَأَيْتُ أَحَدَ عَشَرَ كَوْكَبًا وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ رَأَيْتُهُمْ لِي سَاجِدِينَ (4) قَالَ يَا بُنَيَّ لَا تَقْصُصْ رُؤْيَاكَ عَلَى إِخْوَتِكَ فَيَكِيدُوا لَكَ كَيْدًا إِنَّ الشَّيْطَانَ لِلْإِنْسَانِ عَدُوٌّ مُبِينٌ (5) وَكَذَلِكَ يَجْتَبِيكَ رَبُّكَ وَيُعَلِّمُكَ مِنْ تَأْوِيلِ الْأَحَادِيثِ وَيُتِمُّ نِعْمَتَهُ عَلَيْكَ وَعَلَى آلِ يَعْقُوبَ كَمَا أَتَمَّهَا عَلَى أَبَوَيْكَ مِنْ قَبْلُ إِبْرَاهِيمَ وَإِسْحَاقَ إِنَّ رَبَّكَ عَلِيمٌ حَكِيمٌ (6) لَقَدْ كَانَ فِي يُوسُفَ وَإِخْوَتِهِ آيَاتٌ لِلسَّائِلِينَ.

Annaga ayaa kaaga qisoon qisooyin tan ugu fiican waxyigan quraanka kuu waxyoonay dartiis waxaadna kamid ahayd hortiisa kuwaan wax ogayn《》 markuu nabi Yuusuf ku yiri aabbihii aabbow waxaan arkay kow iyo toban xiddigood, qorraxda iyo dayaxa waxaan arkay iyaga oo ii sujuudsan《》 Wuxuu yiri (nabi Yacquub) wiilkaylw ha uga qisoon riyadaada walaalahaa oy markaas ku dhagraan dhagar illayn shaydaanku dadka wuxuu u yahay col bannaanka taagan(cad)《》Sidaa ayuuna kuu doortay Rabbigaa wuxuuna ku barayaa sheekooyinka(riyooyinka) fasirkooda nicmadiisana dushaaduu dhammaystirayaa iyo Yacquub ehelkiisa siduu ugu taam yeelay labadii waalid marhore ibraahiim iyo isxaaq ilaahaaguna waa oge falsan《》 Xaqiiqdii Yuusuf iyo walaalihiisa waxaa ku sugan aayado(waano qaadasho) kuwa warsanaya([12]).

---

[12]. Suuradda Yuusuf.

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Riyooyinka nabiyada waa xaq.

2. Xaasidnimada iyada ayaaudub-dhexaad u ah shar kasta.

3. Insaanku waa in uusan raacin waddooyinka Sheydaanka.

4. Eebbe waxa uu xifdiyaa ambiyadiisa.

5. Alle qof aanan ahayn ha u baryin.

6. Sabirka waxaa lagu gaaraa martabad sarraysa.

7. In loo baari falo waalidiinta waa waajib.

8. Cafiska iyo saamaxaadda waxay kamid yihiin sifaadka rususha.

9. Waa waajib in laga towbad keeno dembiyada iyo macaasida.

Qisadii Nabi Shucayb

Nabi Shuceyb

Allaah subxaanah watacaalaa Wuxuu reer Madyan u diray nabi Shucayb, Madyan waxay kamid ahayd qabiilada carbeed, waxay degganaayeen hareeraha Shaam, Waxay ahaayeen dad tiro badan, oo jir ahaan xoog badan, waxaa loo barakeeyay irsaaqada, iyo miraha, intii ay ku shukrin lahaayeen nimcooyinka Alle, waxay adeeceen sheydaanka, ku kufriyeen Allihii abuuray, waxay caabudi jireen geed weyn, haddana waxay khiyaamayn jireen beegga, iyo miisaanka, waxay cuni jireen xaaraanta.

Allaah Subxaanah watacaalaa waxa uu u soo diray nabi Shucayb calayhi salaam, wuxuuna nabi shucayb ugu yeeray in ay caabudaan Allaah oo kaliya, oo aysan u shariik yeelin, wuxuuna ka reebay inay caabudaan geedkaasi, wuxuu faray caddaalada, wuxuuna ka reebay dulmiga iyo fasahaadinta arlada, iyo khiyaamaynta beegga.

Dadkii sidaa loo wacdinayay waxaa la soo taagnaayeen hantideenna annaga ayaa iska leh, wixii aan doono ayaan ku samayn.

Waxay gudagaleen in ay ku jeesjeesaan nabi shucayb, isdguna markasta waxa uu xusuusin jiray nimcooyinka Alle.

Marar badan ayuu uga digay cadaabka Alle, oo waxa uu xusuusiyay wixii ku dhacay reer Huud, Thamuud, iyo reer Saalix, balse waa ay ku dhega-adaygeen hadalkaasi, waxayna bilaabeen in ay ugu hanjabaan nabi shucayb iyo intii rumaysay in ay degmada ka saari doonaan.

Allaah subxaanah watacaalaa waxa uu ku soo dejiyay cadaabkiisa kuwii diiday amarkiisa, kuna jeesjeesay nabigiisa.

Rabbi SWT oo nooga warramay qisada reer Shucayb waxa uu yiri:

وَإِلَى مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا قَالَ يَا قَوْمِ اعْبُدُوا اللَّهَ مَا لَكُمْ مِنْ إِلَهٍ غَيْرُهُ وَلَا تَنْقُصُوا الْمِكْيَالَ وَالْمِيزَانَ إِنِّي أَرَاكُمْ بِخَيْرٍ وَإِنِّي أَخَافُ عَلَيْكُمْ عَذَابَ يَوْمٍ مُحِيطٍ.

Madyanna waxaan u dirnay walaalkood nabi Shucayb wuxuuna yiri Qowmkaygow Alle caabuda idinma sugna Alle kale ha nuqsaaminina beegga iyo miisaanka waxaan idinku arkaa kheyre(xoolo) waxaana idinka cabsi qabaa cadaab maalin kooba ([13]).

Eebbe weyne SWT oo inoo sheegaya warcelintii reer madyan waxa uu yiri:

قَالُوا يَا شُعَيْبُ أَصَلَاتُكَ تَأْمُرُكَ أَنْ نَتْرُكَ مَا يَعْبُدُ آبَاؤُنَا أَوْ أَنْ نَفْعَلَ فِي أَمْوَالِنَا مَا نَشَاءُ إِنَّكَ لَأَنْتَ الْحَلِيمُ الرَّشِيدُ﴾

Waxay ku dhaheen Shucaybow ma salaaddaada ayaa ku faraysa in aan ka tagno waxay caabudayeen aabbayaasheenna ama in aynu samayno xoolahayga waxaynu doono adigu waxaad tahay mid dulqaad badan oo hagaagsan [jeesjees dartiis] ([14]).

Kolkii halaagoodii la gaaray baa Rabbi nooga warramay:

وَلَمَّا جَاءَ أَمْرُنَا نَجَّيْنَا شُعَيْبًا وَالَّذِينَ آمَنُوا مَعَهُ بِرَحْمَةٍ مِنَّا وَأَخَذَتِ الَّذِينَ ظَلَمُوا الصَّيْحَةُ فَأَصْبَحُوا فِي دِيَارِهِمْ جَاثِمِينَ.

Marka uu yimid ammarkannagii waxaan ka korinay(badbaadinay) Shucayb iyo kuwii rumeeyay naxariistannada waxaana kuwii dulmiga falay ku habsaday qaylo waxayna ahaadeen kuwo guryahoodii ku dhintay([15]).

---

[13],[14],[15] **Suuradda Huud.**

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Allaah oo kaliya ayaa cibaado u sugnaatay.

2. Fasahaadinta arlada, iyo khiyaamaynta beeca waxay keenaysaa halaag.

3. Salaaddu waxay reebtaa xumaha, iyo munkarka.

4. In dadka loo cadaalad falo waxay kamid tahay tilmaamaha mu'miniinta.

Qisadii Nabi Ayuub

Nabi Ayuub

Nabi Ayuub Calayhi salaam waxa uu kamid ahaa nabiyadii reer bani israa'iil, waxa uu degganaa meel kamid ah Shaam, waxa uu ahaa nin hanti leh, oo caruur, beero, xoolo iyo dhul ballaaran loogu deeqay.

Waxa uu caawin jiray dadka danyarta ah ee tabaalaysan, waxa uuna ehelkiisa iyo dadka deegaankiisaba ugu yeeri jiray in ay caabudaan Allaah oo kaliya.

Nabi Ayuub CS waxa uu kamid ahaa nabiyadii imtixaanka badan soo maray, waxaa lagu ibtileeyay hantidiisa, iyo caruurtiisa oo dhamaatay, waxaa intaa u dheeraa in uu xanuunaaday, waxaa la sheegaa in uu xaaladdaasi ku jiray muddo ku siman 18 sanno.

Nabi Ayuub waxa uu baryay Alle weyne Subxaanah watacaalaa oo mas'uul ka ah kownkan iyo wixii saaran, ilaahey wuu ka ajiibay ducadiisa, waxaana u soo laabtay caafimaadka, hantida, sidoo kale xaaskiisa waxay u dhashay ubad tiro badan, Allaah waa uu u barakeeyay hantidiisa iyo caruurtiisa kaddib markii uu ka sabray imtixaankii haystay.

Aayadaha ka warramaya qisada nabi Ayuub waxaa kamid ah:

وَأَيُّوبَ إِذْ نَادَى رَبَّهُ أَنِّي مَسَّنِيَ الضُّرُّ وَأَنْتَ أَرْحَمُ الرَّاحِمِينَ (83) فَاسْتَجَبْنَا لَهُ فَكَشَفْنَا مَا بِهِ مِنْ ضُرٍّ وَآتَيْنَاهُ أَهْلَهُ وَمِثْلَهُمْ مَعَهُمْ رَحْمَةً مِنْ عِنْدِنَا وَذِكْرَى لِلْعَابِدِينَ (84)

(Xus nabiyow) Ayuub markuu u dhawaaqay Rabbigii isaga oo leh Waxaa i taabtay dhib adiguna waxaad tahay naxariis badane《》 waana ajiibnay Waxaanu ka faydnay(ka dulqaadnay) wixii isaga haystay ee dhib ah waxaanamu siinay reerkiisa iyo in la eg naxariis agtayada ka ahaatay awgeed iyo dadka Eebbe caabuda in ay ku waano qaataan([16]).

---

[16]. Suuradda Anbiyaa'

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Sabirku waxa uu kamid yahay tilmaamihii nabiyada.

2. Adduun waxaa u wanaagsan xaas wanaagsan.

3. Dadka waxaa ugu imtixaanka adag ambiyada.

4. Farajka waxa uu yimaadaa shiddada kaddib.

5. Ducadu waa cibaado.

6. Waa muhiim in Alle loo mahdiyo kolka aad barwaaqaysantahay iyo kolka aad dhibaataysantahay.

Qisadii Nabi Yuunus

Nabi Yuunus

Nabi Yuunus calayhi salaam waxa uu kamid ahaa nabiyadii bani israa'iil, Allaah ayaa u soo diray qowmkiisa oo degganaa tuulo lagu magacaabo Niinawaa oo ka tirsan mowsul- Ciraaq.

Qowmkiisa waxay ka badnaayeen boqol kun oo qof oo isugu jira rag, dumar, iyo caruurba, waxayna caabudi jireen sanamyo, meereyaal, iyo xiddigo,

Allaah ayaa u soo diray nabi Yuunus oo lagu yaqiinay run-sheeg, dhaqan wanaagsan, iyo sharaf uu ku dhex lahaa bulshada, waxa uu ugu yeeray in ay Allaah oo kaliya caabudaan, oo ay ka tagaan sanamyada iyo meerayaasha, wuxuu nabi Yuunus xusiisiyay nimcooyinka uu Allaah ku mannaystay, balse qowmkiisa waxay ku madax-adaygeen gaalnimada, waxayna bioaabeen inay ku jeesjeesaan nabi Yuunus, balse nabi Yuunus waxa uu uga digay carada iyo cadaabka Alle, sidaa oo ay tahay cid qowmkiisa kamid ah oo rumaysay baa iska yar.

Nabi Yuunus oo arrinkaas ka murugaysan ayaa ka tegay tuuladii kaddib markii uu ka quustay in qowmkiisa ay rumeeyaan.

Markii uu raacay doonni oo ay in yar socotay ayay bilowday in ay hirarkii is qabsadaan, nabi Yuunus waxaa lagu tuuray baddii waxaana markiiba liqay kalluun weyn, nabi Yuunus ayaa bilaabay in uu tasbiixsado isaga oo ku jira caloosha kalluunka, Alle SW waxa uu kalluunkii faray in uu sii fasaxo nabi Yuunus, Rabbi SW waxa uu nabi Yuunus u sheegay in uu ku laabto tuulladiisii oo uu dadka ugu yeero diinta, kolkii uu tegay ayay rumeeyeen, Eebbe weyne waxa uu ka qaaday wixii kurbo ahaa ee haystay wuxuuna ku galladaystay nimcooyin farabadan.

Qisada nabi Yuunus meelaha Qur'aanka lagu sheegay waxaa kamid ah suurat As saafaat, Alle SWT waxa uu yiri:

وَإِنَّ يُونُسَ لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ (139) إِذْ أَبَقَ إِلَى الْفُلْكِ الْمَشْحُونِ (140) فَسَاهَمَ فَكَانَ مِنَ الْمُدْحَضِينَ (141) فَالْتَقَمَهُ الْحُوتُ وَهُوَ مُلِيمٌ (142) فَلَوْلَا أَنَّهُ كَانَ مِنَ الْمُسَبِّحِينَ (143) لَلَبِثَ فِي بَطْنِهِ إِلَى يَوْمِ يُبْعَثُونَ (144) فَنَبَذْنَاهُ بِالْعَرَاءِ وَهُوَ سَقِيمٌ (145) وَأَنْبَتْنَا عَلَيْهِ شَجَرَةً مِنْ يَقْطِينٍ (146) وَأَرْسَلْنَاهُ إِلَى مِائَةِ أَلْفٍ أَوْ يَزِيدُونَ (147) فَآمَنُوا فَمَتَّعْنَاهُمْ إِلَى حين.

Nabi Yuunus waxa uu kamid ahaa rusushii la soo diray《》 Xusuuso markuu ku dhuuntay doonidii buuxday《》markaasuu qori tuurtay wuxuuna noqday kuwa laga raayay《》 Waxaa liqay nibirigii isagoo eedaysane ah《》 haddii aanu noqon ahayn kuwa ilaahay u

tasbiixsada 《》 wuxuu ku nagaan lahaa calooshiisa ilaa maalinta dadka la soo saaro《》 Waxaanu ku tuurnay bannaanka isaga oo xanuunsanaya《》 Waxaanu dushiisa ka soo saarnay geedka Yaqdhiinka(aaradubbaha) waxaannu u dirnay boqolkun oo dad ah ama kasii badan《》ilaahey bay rumeeyeen waana u raaxaynay oo sugnay ilaa muddo([17]).

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. In Alle lagu caasiyo waxay sabab u tahay cadaabka oo soo degdega.

2. In Alle loo towbad keeno waxaa lagu feydaa cadaabka iyo kurbooyinka.

3. Tasbiixda iyo istiqfaarta iyo ducadaba waxay faraj u furaan qofka dhibaataysan.

4. Eebbe waxa uu leeyahay ciidamo kala duwan oo cir iyo dhulba leh, kalluunkuna wuxuu ku jiraa ciidankiisa.

---

[17]. Suuradda Saafaat

Qisadii Nabi Muuse iyo Nabi Haaruun

Nabi Muuse iyo Haaruun

Nabi Yacquub cs markii uu galay masar isaga iyo caruurtiisa oo ay deegaan ku yeesheen, waxaa nabi Yacquub lagu naanaysay "israa'iil" .

Kaddib markii ay geeriyoodeen nabi Yacquub iyo caruurtiisa oo uu ku jiro nabi Yuusuf cs, waxaa batay tarantii israa'iil (Yacquub" waxaana duriyaddiisa loo bixiyay reer Bani israa'iil, yacnii tafiirtii ka farcamay nabi Yacquub, waxaa arrinkaasi cabsi geliyay Fircoon oo ahaa boqorkii masar waqtigaasi, wuxuu bilaabay in uu la wareego hantidooda, iyo in uu nolosha ku ciriiriyo.

Waxaa la sheegaa in Fircoon uu mar ku riyooday dab kasoo baxay shaam oo gubayay guryaha masar iyo qasrigiisa, oo haddana aan waxba gaarsiin guryaha reer bani israa'iil , faaliyeyaashii waxay u sheegeen in wiil reer bani israa'iil ah oo dhalan doono uu gacantiisa ku baabi'in doono boqortooyada Fircoon.

Fircoon wuxuu ammar ku bixiyay in la dilo wiil kasta oo reer bani israa'iil ah oo dhasha, ciidankii Fircoon ayaa bilaabay in ay dilaan ciyaalka la dhalo.

Fircoon ayaa Markale yiri: Haddii aynu layno dhammaan wiilasha reer bani israa'iil u dhasha, cid noo shaqaysa ayaa la waayi doonaa.

Waxaa loo soo jeediyay in sanad uu wax dilo, sanadka xigana la iska daayo.

Nabi Haaruun cs waxa uu dhashay sanadk aan dilka jirin, kaddib nabi muuse waxa uu dhashay sannadkii caruurta la layn jiray, haddaba hooyadii nabi muuse maxay samaysay?!

Allaah Subxaanah watacaalaa ayaa u waxyooday hooyadii nabi muuse in ay ku riddo sanduuq isaga oo naas-nuug ah, kaddibna ay ku riddo webiga oo aysan baqin Allaah ayaa u ballanqaaday in uu xifdinayo oo uu soo celin doono isaga oo nabi ah, kaddib waxaa gacanta ku dhigay xaaska Fircoon oo aad ugu faraxday, una sheegtay Fircoon in uusan dilin laga yaabee in uu wax taro ama ay ilmo ka dhigtaan.

Kaddib waxaa loo yeeray dumarkii wax nuujin karay, gebbigoodana wuu diiday ilmihii yaraa, illayn Alle ayaa ka xarimaye, nabi muuse cs walaashiisa oo kor kala socotay arrinta naas-

nuujinta ayaa ku tiri: Ma idin tusaa reer ilmaha nuujiya oo daryeela, kaddib nabi muuse cs waxa uu ku soo laabtay hooyadii oo nuujisay, iyadoo Lacag ku qaadanaysay arrinkaasi.

Nabi muuse cs markii uu korayay, waxa uu ku noolaa guriga Fircoon, halkaas ayuuna kusoo barbaaray, shaqaalaha way yaqaaneen, reer bani israa'iil iyaguna qisadiisa way maqleen.

Nabi muuse cs markii uu kobcay oo nin weyn oo xooggan noqday, maalin maalmaha kamid ah isaga oo magaalada dhexmaraya ayuu maqlay nin leh: ar muusow isoo gaar! Markii uu eegay waxa uu arkay laba nin oo gorodda iskula jira(dagaalamaya), mid uu yahay qowmkii Fircoon, ka kalena reer bani israa'iil, nabi muuse oo doonaya in uu ka qabto ninkii reer bani israa'iil kii kale ee qibdiga ahaa kaas oo dulminayay Ninkii reer bani israa'iil wuxuu ku dhuftay feer, halkaas ayuuna ku geeriyooday ninkii qibdiga ahaa, nabi muuse markii ay xaaladdiiisu degtay wuxuu ka shalaayay waxa uu sameeyay, wuxuuna yiri: kani waa camalka sheydaanka, isagu waa cadow daran, Nabi muuse ayaa dembi-dhaaf weydiistay Allaah.

Muddo kaddib nabi muuse oo magaalada dhex socda oo ka baqaya in la soo sheego ayaa waxa uu arkay isla ninkii kolhore uu ka qabtay ninkii qibdiga ahaa oo haddana nin kale ku dheggan, markii uu nabi muuse u soo dhawaaday ayaa ninkii reer bani israa'iil yiri: Muusow ma waxaad doonaysaa inaad i disho sidii aad u dishay ninkii hore, ninkii qibdiga ahaa ayaa warkaas maqlay wuxuuna farta ka saaray Fircoon, wuxuuna u sheegay in ninkii hore ee la dilay uu ka dambeeyo muuse.

Fircoon waxa uu amar ku bixiyay in la dilo nabi muuse cs, nin kamid ahaa dadkii maqlay amarka dilka nabi muuse oo ordaya ayaa u yimid nabi muuse cs, wuxuuna u sheegay in la doonayo in la dilo haddii la arko, wuxuuna ugu naseexeeyay in uu ka tago magaalada, nabi muuse cs markii loo sheegay warkaasi wuxuu si degdeg ah uga baxay magaaladii, isaga oo sii socda wuxuu ku ducaystay: Rabbiyoow iga badbaadi qowmka daalimiinta ah.

Allaah Subxaanah watacaalaa waa uu ka badbaadiyay nabi muuse mixnaddii daba socotay, wuxuuna qabtay xaggaa iyo Madyan.

Nabi muuse cs waxa uu kasoo tegay masar isagoon ogayn halka uu cagadhigan doono, waxa uu talosaartay Allaah, waxa uuna ka baryay in uu in uu badbaadiyo, Allaah sw ayaa ku simay nabi muuse dhulka Madyan kadib safar dheer iyo daal aad u daran, waxa uu dul-tegay ceel ay ku

hareeraysanyihiin dad badan oo doonaya in ay ka waraabistaan xoolahooda, wuxuu kaloo nabi muuse meesha ku arkay labo hablood oo iyana taagan meel ka fog dadka, balse raba in ay xoolahooda waraabiyaan, Markaas ayuu nabi muuse weydiiyay labadii hablood:

Arrinkiinu muxuu yahay?

Kolkaas bay ku warceliyeen: Annagu waqtiga ay dadkan xoolahooda waraabistaan uun baa waraabsan karnaa, aabbehayna waa oday weyn.

Nabi muuse oo u damqaday hablihii ayaa u waraabiyay xoolihii, kaddibna nabi muuse wuxuu u dhaqaajiyay harkii, Markaas Alle baryay oo yiri: Rabbiyoow wixii aad iigu talagashay ee arsaaqad iyo cunno ah waan u baahanahay.

Kaddib hablihii oo ku laabtay gurigooda ayaa odaygii dhalay aad u la yaabay sidan dhaqsaha leh ee ay ku soo laabteen hablaha, waxa uu weydiiyay waxa maanta helay, Markaas bay u sheegeen in nin xooggan uu xoolahooda u waraabiyay sidaasna ay ku soo degdegeen.

Kaddib odaygii wuxuu u diray mid kamid ah hablihiisa in ay guriga keento, waxaa timid gabadhii oo xishood ku socota, waxayna ku tiri nabi muuse: Aabbahay waxa uu kugu wacayaa in uu kaaga abaalgudo wanaagii aad noo gashay, nabi muuse ayaa aqbalay odayga u yeeraya, wuxuuna tegay gurigiisa, kolkii uu u yimid odyagii oo uu uga warramay sheekadiisa ayaa odaygii ku yiri: Ha cabsan, waad ka badbaaday daalimiinta.

Nabi muuse waxa uu kamid noqday reerkii, mid kamid ah hablihii baa tiri: aabbe shaqa sii ninkan, nin aad shaqa siiso waxaa u fiican mid xooggan oo la aamini karo, odayga halkaa waxa uu ka arkay in gabadhani ay calmatay ninkan, kolkaas buu odayga yiri: Muusow waxaan doonayaa in aan kuu guuriyo mid kamid ah hablahayga, inaad ii shaqayso siddeed sannadood, haddii aad toban sano xoolaha ii raacdo waad samafashay, aniguna ma doonayo in aan ku dhibo, muddadaas dheer waxaan ku wada joogi doonnnaa wanaag, nabi muuse ayaan yiri: heahiiskaasi aniga iyo adiga ayuu noo dhaxeeyaa.

Nabi muuse oo masar ku soo laabtay

Nabi muuse calayhi salaam markii uu muddo ku sugnaa Madyan, waxa uu u xiisay reerkiisa, hooyadii, iyo walaalihiisa, kaddib markii uu ballankii u fuliyay odaygii waxa uu kasoo

dhaqaajiyay nabi muuse magaalada Madyan, waxa uu soo kaxaystay xaaskiisa, waxa uuna dab ka arkay buurta Dhuur-siina, wuxuu xaaskiisa ku yiri: halkaas igu sii sug aan ka warkeenee dabkaasi, markii uu yimid halkaas waxaa looga dhawaaqay dhinaca dooxa midig ee iftiinka ka baxayay, waxaana lagu yiri: Muusow Anigu waxaan ahay rabbiga caalamiinta, Allaah subxaanah watacaalaa ayaa halkaas kula hadlay nabi muuse, waxaana loo diyaariyay in ummada loo diray, waxaa lagu yiri: usha aad sidato dhulka ku rid, kaddib ushii waxay isu beddashay abeeso, kolkaas ayuu nabi muuse baqay, waxaana lagu yiri: ha ka baqin aamin baad tahay, sidoo kale nabi muuse waxaa la tusay mucjiso labaad oo waxaa lagu yiri: gacntaad jeebkaaga geli, waxay soo baxaysaa iyadoo iftiimaysa.

Kaddib nabi muuse Calayhi salaam waxaa loo diray Fircoon iyo qowmkiisa in ay dacwada gaarsiiyaan, Markaas buu nabi muuse yiri: Rabbiyoow aniga qof ayaan ka dilay dadkaasi, waxaana ka baqayaa in ay i dilaan, walaalkay Haaruun ayaa iga iftahansan ee isagu i raaci si uu garab iyo gaashaan iigu noqdo.

Ilaahey ayaa ka aqbalay codsigii nabi muuse, waxaana lagu yiri: Waxaan cududdaada ku adkayn doonnaa walaalkaaga, waxaanu idin yeeli doonaa awood, ee aayadahayga ula taga, idinka iyo kuwa idin raacay ayaa guuleysan doona, waxaa kaloo lagu yiri Markaad Fircoon u tagtaan kula hadla hadal dabacsan

Nabi muuse oo hortagay Fircoon

Nabi muuse oo uu la socdo walaalkiisa Haaruun waxay u tageen Fircoon, waxayna ku yiraahdeen: Waxaan nahay Rusushii Allaah, ee reer bani israa'iil na raaci oo addoonsiga iyo ciqaabta ka dhaaf, waxaynu kuula nimid mucjiso xagga Rabbi ka socota, nabadgalyo dushiisa ha ahaato ciddii hanuunka raacda, ciddii Alle beenisa waxay dusheeda ahaan doontaa cadaab.

Fircoon baa la soo booday: Rabbigiinu waa kuma Muusow?

Rabbigeennu waa ilaaha wax walba siiya abuurkiisa ku munaasabka ahaa kaddibna jiheeya.

Fircoon baa yiri: Bal ummadihii hore arrinkooda ka warran? Oo maxaa lagu halaagay?

Kolkaasuu nabi muuse yiri: cilmigooda Alle xaggiisa ayuu jiraa oo lowxul maxfuudka ayay ku qorantahay.

Waa Allihii dhulka idinka dhigay gogol, wuxuu ka bixiyay dhulka waddooyin, xagga korena biyo ayuu kasoo dejiyay, oo waxaynu kasoo saarnay noocyo dhir ah oo kala baxsan.

Fircoon waxa uu yiri: Haddii uu hadalkaaga dhab yahay bal noo keen calaamad tusaysa dhab ahaanshaha hadalkaaga, nabi muuse waxa uu dhulka dhigay ushii, waxayna isu beddashay abeeso, haddana gacantiisa ayuu jeebka geliyay wuxuuna soo bixiyay iyadoo cad oo ifaysa.

Kaddib Fircoon waxa uu yiri: Muuse ma wuxuu isu beddalay sixiroole, oo iminka ma wuxuu doonayaa in uu magaalada nooga saaro sixirkiisa.

Fircoon oo nabi muuse la hadlaya ayaa yiri: Muusow maalinta aad rabto qabso, waxaan kuula iman doonaa wixii sixiroolayaal ah oo magaalada ku sugan, nabi muuse waxa uu la ballamay in maalinka ciidda la isu yimaado si dad badan ay u yimaadaan goobta, dadkii baa arla kasta ka wada yimid, si ay u daawadaan waxa dhexmari doona nabi muuse cs iyo sixiroolayaasha Fircoon.

Waxaa goobta yimid sixiroolayaashii Fircoon waxayna Fircoon ku yiraahdeen: Wax abaalgud ah miyaan leenahay haddaynu ka adkaano muuse?

Kolkaas ayuu Fircoon ku jawaabay: Haa, waxaad ka midnoqon doontaan kuwa iigu dhow.

Intaa kaddib sixiroolayaashii ayaa ku yiri nabi muuse: Ma adiga ayaa bilaabaya mise annaga?

Nabi muuse waxa uu ugu jawaabay: idinka ku hormara.

Kaddib sixiroolayaashii waxay goobta kusoo tuureen ulo, iyo xargo, goobtiina waxay isku beddashay meel ay buuxdhaafiyeen masas, iyo abeesooyin, Fircoon iyo qowmkiisa ayaa si weyn ugu farxay arrinkaas, nabi muuse Calayhi salaam waxa uu dareemay xoogaa cabsi ah, kaddib Allaah ayaa u waxyooday :Ha cabsan adiga ayaa gacanta sare leh, kaddib nabi muuse waxaa la faray in uu dhulka dhigo usha uu sitay, waxayna ushii isku beddashay abeeso weyn oo mid mid u cuntay ulihii iyo xargihii masaska ahaa ee sixiroolayaasha soo rideen, kaddib ushii ayuu si deggan u soo qabtay nabi muuse.

Halkaas waxaa sixiroolayaashii ugu caddaatay in muuse uu yahay nabi xagga Allaah laga soo diray, arrinkuna uu sixir ka weynyahay oo awoodda Rabbi ay meesha timid, waxaana wada sujuuday sixiroolayaashii oo yiri: waxaynu rumaynay Rabbiga caalamiinta.

Fircoon oo tallaabadaasi ka carooday ayaa ugu goodiyay in uu gacmaha iyo lugaha ka jari doono.

Fircoon oo badda lagu halaagay

Markii mucjisooyinkaas la tusay Fircoon ayuu ka madax-adaygay, Allaah waxa uu ku imtixaanay masar iyo dhulkii Fircoon ka talin jiray abaar, ayax, xasharaad kala duwan, iyo biyaha ay cabi jireen oo dhiig isku beddalay, markasta waxay dhihi jireen: Muusow dhibtaas Alle noo bari in uu naga qaado, waynu rumayn doonaaye, balse ma aysan rumayn, waxayna sii wateen gaalnimadooda.

Allaah Subxaanah watacaalaa ayaa nabi muuse u waxyooday in isaga iyo reer bani israa'iil ay ka baxaan masar, waxaana bixitaankooda ka warhelay Fircoon oo soo dabadhigtay, ilaa nabi muuse iyo reer bani israa'iil ay ka soo gaaraan badda qarkeeda, nabi muuse iyo qowmkiisa waxay dhexda u galeen badda iyo Fircoon, balse Allaah waxa uu ku amray nabi muuse in uu badda ul ku dhufto, waxaana ka dillaacay waddo weyn oo la mari karo, nabi muuse iyo qowmkiisa waxay ka gudbeen wadadii, Fircoon ayaa isaguna soo dabagalay, kolkii isaga iyo ciidankiisa ay soo galeen ayaa baddii isu timid oo sideedii ku soo noqotay.

Halkaas ayayna ku halaagsameen fircoon iyo qowmkiisa, nabi muuse iyo dadkii la socdayna ilaahey ayaa badbaadiyay.

Allaah Subxaanah watacaalaa markii uu halaagay Fircoon, waxa uu reebay jirkiisa si ay cibro ugu noqoto dadka kale.

Nabi muuse iyo reer bani israa'iil ayaa dhulkii u haray, waxaana la siiyay Towraat, nabi muuse iyo Nabi Haaruun waxay ku dadaaleen dacwada Alle, iyo in reer bani israa'iil ay caabudaan Allaah oo kaliya, nabi muuse oo ku maqan halkii waxyigu ku soo degi jiray reer bani israa'iil oo ku dhaafay Nabi Haaruun, ayaa waxaa yimid nin la yiraahdo Saamiri oo baadi iyo dembi ku riday dadkii, waxa uu sameeyay Ninkii shay qaab dibi leh, waxa uuna u sheegay reer bani israa'iil in dibigan uu yahay ilaahoodii iyo ilaaha muuse!

Nabi Haaruun ayaa marar badan waaniyay qowmka una sheegay in Allihii abuuray uu yahay kii badbaadiyay.

Nabi muuse markii uu yimid waxa uu la anfariiray waxay ku dhaqaaqeen qowmkiisa, wuxuuna gubay dibbigii, wuxuu ninkii saamiri ahaana ku habaaray in uu ummada ka dhexbaxo oo aan la taaban karin.

Nabi muuse calayhi salaam waxa uu soo xushay 70 nin si ay Alle ugu towbad keenaan.

Nabi muuse waxa uu muddo ugu yeerayay reer bani israa'iil in ay diinta soo galaan oo ay qaataan amarka Allaah.

Qisadii saca iyo reer bani israa'iil

Xilligii nabi muuse Calayhi salaam waxaa dhacday in nin hantiile ah oo reer bani israa'iil Kamid ah la dilay, waxaana lagu wareeray cidda dishay ninkan, Markaas bay reer bani israa'iil u tageen nabi muuse, nabi muuse cs ayaa Alle baryay si loo tuso ninkii dilka geystay, Allaah ayaa faray reer bani israa'iil in ay qalaan neef lo' ah, reer bani israa'iil waxay ku warceliyeen: ma nagu jeesjeesaysaa Muusow?

Nabi muuse waxa uu yiri: ilaahey ayaan ka magangalay in aan jaahiliinta ka midnoqdo.

Reer Bani israa'iil arrinkii way isku adkeeyeen, waxaa loo diray lo' uun balse waxay ku yiraahdeen nabi muuse: Muusow rabbi noo tuug si uu noogu caddeeyo tilmaanta sacaasi, waxaa loo sheegay in neefku uu yahay mid aan duq ahayn, oo aan yarayn labadaas ayay u dhaxaysaa , haddana waxay codsadeen in neefkaas midabkiisa loo sheego, waxaa loo sheegay in ay tahay sac boora ah, oo boornimadeedu darantahay, oo cajabisa kuwa eega, waxay markale soo celiyeen su'aal: Alle noo bari Muusow ha noo caddeeyo waxay tahay maxaa yeelay waxaa iskaga kaana shabahday lo'da hadduu Alle doonana waan ku hagaagaynaa.

Waxaa lagu yiri: waa neef lo' ah oo aan laylanayn oo dhulka qoda, beertana ma waraabiso, waana mid aan ceeb lahayn midabkeeduna saafi yahay, Markaas bay soo heleen neefkii, waana la qalay, gabal ama waslad kamid ah neefka ayaa ka faray in lagu dhufto ninkii maydka ahaa, kaddib Allaah ayaa soo nooleeyay ninkii, waxaana lagu yiri: Yaa ku dilay hebelow?

Kolkaas ayuu sheegay ninkii dilay oo ahaa wiil uu adeer u ahaa, sidaas ayuu Alle u soo nooleeyaa dadka dhintay.

Nabi muuse iyo Khadir(خضر)

Maalin maalmaha kamid ah nabi muuse oo u khudbaynaya reer bani israa'iil ayaa waxaa la weydiiyay, yaa ugu aqoon badan dadka dhulka saaran?

Kolkaas ayuu nabi muuse ku jawaabay: Aniga.

Allaah Subxaanah watacaalaa ayaa u sheegay nabi muuse in uu jiro nin garanaya wax aanu nabi muuse aqoon, waana khadir, sidoo kale nabi muuse waxaa la faray in uu horay u qaato kalluun, marka uu Kalluunka waayo halkii uu ku waayo ayaa loogu sheegay khadir, nabi muuse markii uu arkay khadir waxa uu ku yiri: miyaan ku raacaa si aan cilmigaaga wax uga barto?

Khadir baa ku warceliyay: adiga ma karaysid la jirkayga sabir, nabi muuse ayaa yiri: waad i heli haddii Alle idmo mid ku samra oo aan kugu caasiyin arrin.

Waxaa lagu ballamay in nabi muuse uusan wax su'aal ah weydiin karin khadir ilaa uu isaga ugu sheego, waxay isla raaceen doon, kolkaas buu khadir rujiyay doontii, Markaas buu nabi muuse yiri: Ma waxaad u dan leedahay inaad dadkeeda maashayso, kolkaas baa la xusuusiyay nabi muuse ballantii uu galay ee ahayd in uusan wax su'aal ah keenin,

markale ayay dhaqaajiyeen ilaa ay la kulmaan wiil khadir baa waxa uu dilay wiilkii, kolkaas baa nabi muuse yiri: ma Waxaad dishay naf daahir ah oo aan naf dilin, Waxaad la timid shay la kahdo, markaas buu khadir yiri: miyaanan ku oran adigu ma karaysid la jirkayga samir, nabi muuse ayaa ku warceliyay: Haddaan wax kale ku weydiiyo ha ila saaxiibin Waxaad gaadhay garowsho xaggayga ahe.

Intay isa soo raaceen waxay yimaadeen magaalo, kolkaas bay dadkii magaalada warsadeen cunto, balse dadkii magaalada ayaa diiday inay martigeliyaan, nabi muuse iyo khadir waxay heleen derbi ku dhow in uu soo dumo oo sii ciiraya kolkaasuu toosiyay khadir, markaas buu nabi muuse yiri: Haddii aad doonayso waxaad hagaajintiisa ka qaadi lahayd mushqaayad/ujuuro, markaas buu khadir u sheegay in kulankoodu uu halkaas ku dhamaaday.

waxa uu u sharraxay dhacdooyinkii uu garan waayey, waxa uuna yiri: doonto waxaa iska lahaa dad masaakiin ah oo badda ka shaqaysta, waxaana hortooda jiray boqor qaata doon kasta oo fayow, waxaana rabay inaan ceeb u sameeyo, wiilkana labadiisa waalid waxay ahaayeen

mu'miniin waxaana ka cabsannay in uu ku kallifo oo uu u horseedo xadgudub iyo gaalnimo, waxaanu doonnay ilaahoodu inuu u dooriyo mid ka wanaagsan xagga nadaafadda iyo iimaanka iyo u dhawi naxariis, tan derbiga, gidaarka waxaa lahaa oo u sugnaaday laba wiil oo agoon ah kuwaas oo magaalada joogay, hoostiisana waxaa ugu jiray kayd, waalidkoodana mid wanaagsan buu ahaa ilaahaagu wuxuu doonay in ay gaaraan waqtigii ay kala soo bixi karayeen, oo ay kaydkooda lasoo baxaan, waa raxmad xagga rabbi ka timid, arrinku iraadadayda oo kaliya ma ahayn, inta aan kuu sheegay waa fadiraadda shaygii aad ku sabri kari weyday.

Geeridii nabi muuse cs

Nabi muuse calayhi salaam muddo badan ayuu la joogay reer bani israa'iil, waxa uu ku bixiyay dadaal weyn si ay diinta u qabsadaan, waxa uu la kulmay imtixaanaad kala duwan, ummadiisuna waxay kamid noqotay ummadaha ugu tira badan, markii Alle doonay in nabi muuse nafta laga qaado waxa uu u soo diray malakul mowt, Malaga markii uu u yimid nabi muuse waxa uu ku yiri: Muusow rabbigaaga ajiib, kolkaas ayuu nabi muuse isha ka dhuftay malagii oo ishiisa soo dhacday, malagii ayaa yiri: Rabbiyoow waxaad ii dirtay nin aan dhimasho rabin, malagii ayaa mar labaad lasoo diray oo lagu yiri u sheeg muuse: Haddii aad doonayso inaadan dhiman gacantaada waxaad saartaa dibbigaas haragiisa, wixii tin kasta oo ka hoosmarta gacantaada waa sanad aad noolaqnayso, nabi muuse ayaa yiri: haddaan sanadahaas badan noolaado maxaa ka dambeeya? Waad dhimanayaaa, nabi muuse ayaa malagii ku yiri: hadda iga qaad nafta, waxa uu nabi muuse weydiistay Allaah in lagu aaso meel u dhow baytal maqdas.

Muddo kaddib nabi Haaruun ayaa geeriyooday, duriyadda reer bani israa'iil way badatay ilaa ay kamid noqotay ummadaha ugu tirada badan.

Qur'aanka kariimka ah meelo aad u badan ayaa lagu sheegay qisada nabi Muuse CS waxaana kamid ah:

هَلْ أَتَاكَ حَدِيثُ مُوسَى (15) إِذْ نَادَاهُ رَبُّهُ بِالْوَادِ الْمُقَدَّسِ طُوًى (16) اذْهَبْ إِلَى فِرْعَوْنَ إِنَّهُ طَغَى (17) فَقُلْ هَلْ لَكَ إِلَى أَنْ تَزَكَّى (18) وَأَهْدِيَكَ إِلَى رَبِّكَ فَتَخْشَى (19) فَأَرَاهُ الْآيَةَ الْكُبْرَى (20) فَكَذَّبَ وَعَصَى (21) ثُمَّ أَدْبَرَ يَسْعَى (22) فَحَشَرَ فَنَادَى (23) فَقَالَ أَنَا رَبُّكُمُ الْأَعْلَى (24) فَأَخَذَهُ اللَّهُ نَكَالَ الْآخِرَةِ وَالْأُولَى (25) إِنَّ فِي ذَلِكَ لَعِبْرَةً لِمَنْ يَخْشَى.

Ma ku soo gaaray warkii nabi Muuse《》 goortii uu ugu yeeray rabbigii toggii la hufay ee Dhuwaa ahaa magaciisa《》 kuna yiri u tag fircoon wuu xadgudbaye《》 ku dheh ma kuu

sugnaatay inaad daahirnaato oo hufnaato《》 anigana aan kugu hanuuniyo rabbigaa jidkiisa oo aad ka cabsato《》 Wuxuu tusiyay aayad (mucjiso) weyn《》wuu beeniyay oo caasiyay (fircoon)《》 wuuna jeestay isaga oo ordaya《》 kolkaasuu kulmiyay dadkii kuna qayliyay《》 wuxuu yiri aniga uunbaa ah rabbigiina koraynta badnaa《》 markaasaa Eebbe qabtay oo ciqaabay aakhiro iyo adduuba《》 arrintaasina (cibro) wax ku qaadasho ayaa ugu sugan ruuxii Alle ka baqaya([18]).

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Allaah Subxaanah watacaalaa waxa uu dhowraa oo ilaaliyaa addoomadiisa.

2. Eebbe waxa uu u naxriistaa qofkii arrinkiisa u dhiibta.

3. Fircoon waxa uu sheegtay in uu yahay Rabbiga kownka, haddana waxa uu ka baxsan waayay biyihii lagu halaagay.

4. Xishoodku waa muhiim rag iyo dumarba.

5. Ammaanadu waxay kamid tahay sifooyinkii nabiyada.

6. Waa muhiim in loo sabro dhibaatada.

7. Daalim kasta waxa uu leeyahay waqti uu go'o/ dhinto.

8. Fircoon waxa uu kamid ahaa keligii-taliyeyaashii ugu liitay ee soo maray dunida.

9. Qofkii Alle talosaartay ayaa badbaadaya.

---

[18]. Suuradda Naasicaat

Qisadii Nabi Daawuud

Nabi Daawuud

Geeridii Nabi Muuse Cs kaddib_ reer Bani israa'iil waxay u tageen nabigooda, waxayna ka dalbadeen in uu Alle u baryo si loogu soo saaro boqor ay la dagaal galaan si ay u xorraystaan deegaankoodii laga soo saaray.

Nabigii ayaa u sheegay in ilaahey u dooray Daaluut in uu boqor u noqdo iyaga, balse reer Bani israa'iil ayaa arrinkii ka biyo diiday oo waxay yiraahdeen: Sidee bay suuragal ku tahay in Daaluut boqor loogu doorto innaga oo kaga xaq badan boqornimo, hantina kaga habboon.

Waxaase loo sheegay in Daaluut uu Alle doortay oo uu kaga fadilay aqoon, jir, maskax iyo garaad dheerina ay la jirto, hoggaaminta iyo hawlaha dagaalkana uu ku fiicanyahay.

Daaluut ayaa sameeyay diyaargarowgii ugu dambeeyay si uu u waajaho madaxyaweyntii iyo raggii xoogga badnaa ee uu dagaalka kala dhaxeeyay.

Daaluut oo ay la socdaan ciidamo aad u badan ayaa u soo dhaqaaqay goobtii dagaalka, markii la isu gacan-qaaday waxaa meesha kasoo muuqday nin dhallinyaro ah oo dagaalka ku jira waa Nabi Daawuud Cs, waqti aan sidaa u fogayn ayuu ku dilay Nabi Daawuud ninkii Jaaluut ahaa oo hoggaaminayay colkii iyaga kasoo horjeeday, aad baa loogu ammaanay arrintaasi Nabi Daawuud.

Daawuud boqor iyo nabi

Kolkii Nabi Daawuud uu dilay Jaaluut, waxaa la sheegaa in uu guursaday gabadh uu dhalay boqor Daaluut oo ugu dambayn uu ka dhaxlay boqortooyada, reer Bani israa'iil aad ayay u jeclaadeen Daawuud, Allaah Subxaanah watacaalaa waxa uu ku soo dejiyay kitaabka Towraat, waxa uuna noqday Nabi iyo Boqor.

Buuraha iyo shimbiraha ayaa la tasbiixsan jiray

Nabi Daawuud CS waxa uu ahaa mid u tasbiixsada u na xamdiya Rabbi SW, markasta oo uu tasbiixsado waxaa soo dul-istaagi jiray shimbiraha oo la tasbiixsan jiray, sidoo kale buuraha ayaa la tasbiixsan jiray habeen iyo dharaar.

Nabi Daawuud CS- waxa uu ahaa qof aad u cibaadaysta, maalin isagoo ku tukanaya mixraabka waxaa u soo galay laba nin oo murmaya, markii uu doodooda u kuur galay ayuu mid u xukmiyay, kolkaas ayuu dareemay in uu fududaaday, Alle intuu baryay ayuu dembidhaaf weydiistay, Alle na wuu u dembidhaafay.

Nabi Daawuud wuxuu ahaa nin salaad badan, soonkana aad ugu wacan, waxaa lagu sifeeyay mid sabir badan, oo towbad badan.

Nabi Muxammad NNKH waxa uu noo sheegay in soonka Nabi Daawuud uu yahay midka loogu jeclahay xagga Alle, maalin ayuu soomi jiray, maalinta kalena wuu iska afuri jiray, sidoo kale Qiyaamu leylka Daawuud in uu yahay kan loogu jecel yahay xagga Alle, wuxuuna cuni jiray wixii muruqiisa uu ku kasbado.

Wuxuu reer bani israa'iil dhexjoogay in muddo ah, markii uu geeriyooday waxaa ka dambeeyay wiilkiisa Suleymaan oo Alle ka dhigay Nabi.

Alle SWT waxa uu suuradda Saba' ku yiri:

وَلَقَدْ آتَيْنَا دَاوُودَ مِنَّا فَضْلًا يَا جِبَالُ أَوِّبِي مَعَهُ وَالطَّيْرَ وَأَلَنَّا لَهُ الْحَدِيدَ.

Xaqiiqdii nabi Daawuud waxaannu siinnay fadli(dheeraad) xagganaga ahw axaannu niri buurahow la celceliya tasbiixda shimbirahow la celceliya tasbiixda waxaana u jilcinay birta ([19])

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Qofka mu'minka ah wuxuu kalsooni ku qabaa Alle weyne Subxaanah watacaalaa.

2. Boqornimada Alle ayaa bixiya.

3. Kooxda yar ee mu'miniinta ah waa ay ka adkaan karaan in badan oo gaalo ah , haddii ay Alle talosaartaan.

4. Soonka ugu wanaagsan waa kan Daawuud, qiyaamkana waxaa u fadli badan kii Daawuud.

---

[19]. Suuradda saba

Qisadii Nabi Suleymaan

Nabi Suleymaan

Nabi Suleymaan Calayhi salaam- waxa uu kamid ahaa nabiyadii loo soo diray reer bani israa'iil, waxa uu talada la wareegay kaddib geeridii aabbihii, waxa uu ahaa hoggaamiye caadil ah, oo dadka u siman, Allaah Subxaanah watacaalaa ayaa ka ajiibay ducadiisa ahayd in la siiyo boqortooyo aan waligeed la arag dib dambena loo arki doonin nooceeda, waxaa loo sakhiray dabaysha oo halkii uu doono u qaada, waxaa kaloo loo sakhiray jinka, shayaadiinta kuwo badaha quusta, iyo kuwo guryo dhisa, shimbiro ayaa loo sakhiray sidoo kale.

Nabi Suleymaan iyo Quraanjadii

Nabi Suleymaan Calayhi salaam waxaa la baray afka shimbiraha, quraanjada, iyo xayawaanaadka in kamid ah.

Maalin isaga oo ay diyaar u yihiin ciidan xooggan oo isugu jira Jin, Insi, Xayawaanaad, Iyo shimbiro, isaguna uu hoggaan u yahay ciidankaasi ayuu maqlay cod hoose oo leh: Bah quraanjooy gurihiinna ku xarooda; yaanu Suleymaan iyo ciidankiisa cagta idin marin iyagoo warmoog ah, Nabi Suleymaan oo hadalkaas maqlay ayaa dhoolacadeeyay, gacihiisa ayuu kor u taagay, wuxuuna Allaah uga mahadnaqay nimcooyinka isaga iyo waalidkiisa lagu mannaystay, wuxuuna Alle ka baryay in uu ku daro addoomadiisa wanaagsan.

Nabi Suleymaan iyo Hud-Hudkii

Shimbirka Hud-Hud la yiraahdo waxa uu nabi Suleymaan ka garab siin jiray in uu u tilmaamo meeshii biyo ay ku jiraan, maalin ayuu nabi Suleymaan baadi-goobay shimbirkii waase uu waayay, aad buu uga carooday arrinkaas nabi Suleymaan, wuxuuna ballan ku galay in uu ciqaab daran marsiin doono haddii shimbirkaasi aanu war fiican la imaan.

Hud-Hudkii baa yimid isagoo nabi Suleymaan u sheegay in uu u sido war culus oo uu u baahanyahay;

Hud-Hudkii oo hadalkii bilaabay ayaa yiri: Waxaan soo helay oo aan war kaaga sidaa boqortooyo la dhaho Saba' (Yemen ayay ka jirtay) oo haweeneyda u talisa aad looga dambeeyo, sariir aad u weyn oo qurxoon ayay leedahay haweeneydaasi, waxaan soo arkay in haweeneyda

iyo qowmkeedaba ay u sujuudaan qorraxda halkii ay Alle caabudi lahaayeen, Sheydaan baa u qurxiyay camalkaasi xunna.

Nabi Suleymaan oo si fiican u dhugtay hadalkii ayaa yiri: Waan eegi haddii warkaag uu run yahay iyo haddii kaleba, waxaa Hud-Hudkii loo dhiibay farriin loo diray boqoraddii Saba' ee Balqiis.

Hud-Hudka markii uu qaaday farriintii ayuu dhigay boqorad Balqiis horteeda, markii boqoradda aragtay farriinta waa ay furtay, wayna akhriday wixii ku qornaa, waxayna shir degdeg ah isugu yeertay wasiiradeedda si looga arrinsado arrinkan soo kordhay, waxay ku tiri wasiiradii:

Waxaa la igu soo tuuray qoraal wanaagsan, waxaa soo diray Suleymaan, wuxuuna ku bilaabay magaca Alle, wuxuu kaloo yiri: ha igu kibrina, ii imaada idinkoo Alle u hoggansan, markaasay ku tiri dadkii: dadkiinan madaxda ahow arrinkayga iiga jawaaba, Anigu talo goosan maayo jeer aad goobjoog u noqotaan.

Markaasay yiraahdeen: Annagu waxaan nahay dad awood badan oo balaayo u saaxiib ah, taladuna waa xaggaaga ee ka fiirso waxaad na fari lahayd.

Kolkaasay tiri: Dadka madaxda ahi hadday magaalo soo galaan way dabarogaan oo aafeeyaan, cagtana way mariyaan , dadkeeda sharafta lehna waxay ka dhigaan kuwo dullaysan, sidaasay sameeyaan.

Balqiis waxay isku dayday in ay tijaabiso Nabi Suleymaan oo ay u dirto haddiyad, ninkii haddiyada loo dhiibay kolkii uu u tegay Nabi Suleymaan ayaa lagu yiri:

Ma waxaad ii keenteen xoolo, wixii ilaahey i siiyay baa ka kheyr badan, haddiyadiina ayaadba ku faraxsantihiin, war haddaba u la noqo oo qaad, waxaannu keeni doonaan ciidan aan la horjoogsan karin, waannu ka saari doonaa iyagoo dullaysan.

Balqiis waa ay garatay in dad fudud aysan ahayn dadkaasi, waxayna go'aansatay in ay iyadu u tagto.

Cifriitkii muxuu yiri?

Nabi Suleymaan markii uu ogaaday in ay soo socoto boqoradda Saba' iyo qowmkeeda wuxuu ciidankiisa weydiiyay ciddii keeni lahayd sariirta boqoradda, kolkaas baa Jin xoog badan/cifriit wuxuu yiri: Aniga ayaa kuu keenaya sariirta inta aadan ka kicin goobta aad fadhido, keenisteeda awood baan u leeyahay waana la igu aamini karaa.

Nin cilmi u lahaa kitaabka ilaahey baa isna yiri: Anaa cirshigaas/sariirta kuu keeni inta aannu isha hoos u soo celin, markii uu arkay nabi Suleymaan sariirii oo dhiniciisa taalla waxa uu yiri: Kani waa dheeraadkii ilaahey na siiyay si uu u imtixaano miyaan ku shukrin mise waan dafiri, kan mahadnaqa naftiisa uun buu u mahadnaqay, kan dafira nimcada Eebbe, Alle waa mid kaaftoon oo deeq badan.

Nabi Suleymaan waxa uu yiri: Wax ka baddala sariirtan aan eegno in ay garato iyo in kale, kolkii ay timid baa la weydiiyay in sariirteeda ay tahay sidan oo kale, kolkaasay ku jawaabtay waaba isagii oo isaga ah, waxaa la gartay in ay tahay qof feker dheer leh, kaddib nabi Suleymaan wuxuu ugu yeeray in ay Alle rumayso, qorraxdana ay kamid tahay makhluuqaadka ilaahey, kolkaas ayay rumaysay Balqiis, Alle na u hoggansantay.

Geeridii Nabi Suleymaan

Maalin maalmaha kamid ah nabi Suleymaan waxa uu jinkii faray in ay dhisaan dhisme aad u weyn, Nabi Suleymaan oo ku tiirsan ushiisa ayaa mixraabka fariistay, isaga oo sidaa ah ayay naftu ka baxday, jinku har iyo habeen waa ay shaqaynayeen mana ogayn in uu nabi Suleymaan geeriyooday, ilaa arkeen ushiisa oo aboor cunay.

Qisada nabi Suleymaan meelo badan oo Qur'aanka ah ayaa lagu sheegay, waxaana kamid ah:

وَلِسُلَيْمَانَ الرِّيحَ غُدُوُّهَا شَهْرٌ وَرَوَاحُهَا شَهْرٌ وَأَسَلْنَا لَهُ عَيْنَ الْقِطْرِ وَمِنَ الْجِنِّ مَنْ يَعْمَلُ بَيْنَ يَدَيْهِ بِإِذْنِ رَبِّهِ وَمَنْ يَزِغْ مِنْهُمْ عَنْ أَمْرِنَا نُذِقْهُ مِنْ عَذَابِ السَّعِيرِ (12) يَعْمَلُونَ لَهُ مَا يَشَاءُ مِنْ مَحَارِيبَ وَتَمَاثِيلَ وَجِفَانٍ كَالْجَوَابِ وَقُدُورٍ رَاسِيَاتٍ اعْمَلُوا آلَ دَاوُودَ شُكْرًا وَقَلِيلٌ مِنْ عِبَادِيَ الشَّكُور.

Nabi Suleymaan waxaan u sakhirnay dabaysha kallaheedu waa bil carraabitaankeeduna waa bil waxaan u dureerinay il nuxaas(maar) ah jinkana waxaa kamid ah kuwo ku horshaqeeya idanka Eebbe ruuxii kamid ah oo ka iilata amarkanaga waxaan dhadhansiinaynaa cadaabka saciiro《》

Waxay u sameeyaan nabi Suleymaan wixii uu doono oo mixraabyo (fooqaq) iyo suurooyin iyo xeedhooyin dar oo kale ah iyo dharyo sugan waxaana ku nidhi fala ehelka Daawuudow mahadnaq waxaana yar addoomadayda shugriga badan([20])

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani ?

1. Allaah ninkuu doono ayuu boqor ka dhigaa.

2. Makhluuqaadka oo idil Alle ayay u tasbiixsadaan.

3. Makhluuq kasta oo kownkan ku sugan kaalin buu ku leeyahy nolosha sida Hud-Hudka oo kale.

4. In dadka diin loogu yeero qof kasta ayaa laga rabaa.

5. Jinku waxaa abuuray Allaah, kamana xoog badna khaaliqii abuuray.

6. Jinku waxyaabaha qarsoon ma yaqaanaan, hadday war u hayn lahaayeen waxay ogaan lahaayeen geerida nabi Suleymaan oo hawshaa adag kuma jireen.

7. Imtixaanka waxa uu noqon karaa hanti ama nicmo qofka la siiyey.

---

[20]. Suuradda Alnaml

Qisadii Nabi Ilyaas

Nabi Ilyaas

Ilyaas calayhi salaam wuxuu kamid ahaa rusushii reer Bani israa'iil loo soo diray, Allaah subxaanah watacaalaa Wuxuu u soo diray dadkii degganaa magaalada Bacalbak oo shaam ka tirsanayd, waxay dadkaasi caabudi jiray sanam la oran jiray Baclaa.

Ilyaas calayhi salaam wuxuu ugu yeeray dadkaasi inay ka tagaan sanam caabudista, oo ay caabudaan Allihii kawnkan abuuray, balse way beeniyeen Rasuulkii loo soo diray, iyo risaaladii loo soo dhiibay, Kuwii beeniyay abaalmarintooda waxay la kulmi doonaan qiyaamaha markii la keeno jahannamo, sida uu Allaah quraankiisa ku sheegay :

وَإِنَّ إِلْيَاسَ لَمِنَ الْمُرْسَلِينَ (123) إِذْ قَالَ لِقَوْمِهِ أَلَا تَتَّقُونَ (124) أَتَدْعُونَ بَعْلًا وَتَذَرُونَ أَحْسَنَ الْخَالِقِينَ (125) اللَّهَ رَبَّكُمْ وَرَبَّ آبَائِكُمُ الْأَوَّلِينَ (126) فَكَذَّبُوهُ فَإِنَّهُمْ لَمُحْضَرُونَ (127) إِلَّا عِبَادَ اللَّهِ الْمُخْلَصِينَ (128)

Ilyaas wuxuu kamid yahay rusushii la soo diray (123), waxaad xustaa waqti uu qowmkiisa ku yiri miyaydaan ilaah ka cabsanayn (124) Ma waxaad caabudaysaan bacal (sanam magaciisa) oo ma waxaad ka tegaysaan inta wax abuurta kuwa u wanaagsan(125) Allaah ayaa ah rabbigiina iyo rabbigii aabayaashiina hore abuuray (126) way beeniyeen waana kuwo la soo tubi doono weeye(127) addoomaha ilaahey ee wanaagsan mooyee ([21])

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

▪Allaah subxaanah watacaalaa kaliya ayaa u sugnaatay cibaado.

▪Allaah ayaa abuuray wixii kawnkan ku sugan oo idil.

▪Allaah wuxuu badbaadiyaa addoomadiisa mu'miniinta ah.

---

[21]. Suuradda Saafaat

Qisadii Nabi Sakariye iyo Yaxye

Nabi Sakariye iyo Yaxye

Nabi Sakariye Calayhi salaam waxa uu kamid ahaa nabiyadii Alle doortay, wanaagiisana Qur'aanka ayaa na loogu sheegay.

Nabi Sakariye marka uu u soo galo Maryama bintu Cimraan oo ahayd gabar wanaagsan iyada oo ku cibaadaysanaysa mixraabka, waxa uu arki jiray irsaaqad badan oo dhinaceeda tuban, khudaar aan xilligaas deegaanka laga heli jirin ayaa dhinaceeda buuxay, marka uu weydiiyo halka ay ka keentay, waxay ku warcelin jirtay in xagga Alle ay ka yimaadeen irsaaqadda, Eebbena uu qofka uu doono irsaaqo.

Nabi Sakariye xaaskiisa umay dhalin caruur, sidaa awgeed waxa uu baryay Allaah si uu u helo durriyad wanaagsan isaga oo da' ah.

Nabi Sakariye waxa uu bilaabay in uu Mixraabka ku ducaysto, Allena uu weydiisto in uu kheyr ku irsaaqo.

War farxad leh baa yimid

Nabi Sakariye isaga oo cibaadada iyo Alle bariga sii wada waxaa u timid bishaaradii, waxaana lagu yiri: Sakariyoow waxaan kuugu bishaaraynaynaa wiil la yiraahdo Yaxye.

Farxaddii ayaa ka tanbadisay, markaas ayuu la soo booday: Rabbiyoow sideen u heli karaa wiil aniga oo da' gaaray, xaaskayguna aysan wax dhalin?

Waxaa loogu warceliyay: Waa sida uu Rabbi xukmiyay, arrintaasi way u sahlantahay, adoon jirin baa lagu abuuray laftaada.

Muddo aan sidaas u sii fogayn kaddib waxaa dhashay wiilkii Yaxye ahaa, Yaxye si la yaab leh ayuu dunida ku yimid, waxaa dhalay aabbe da' ah iyo hooyo aan wax dhalin, kolka uu weynaaday oo uu koray, kaalinna galay waxa uu noqday qof caqli badan oo ka fekera in dadka loogu yeero cibaadada iyo adeecidda Alle, iyo ka tegidda dembiyada iyo macaasida.

Markasta oo ay caruurta ugu yeeraan ciyaar, waxa uu dhihi jiray: Ciyaar la iima abuurin ee Cibaado ayaa la inoo abuuray, isaga oo yar ayuu kitaabka bartay oo xifdiyay, waxa uu ahaa baarri u samafala waalidiintiisa, ma uusan ahayn nin isla weyn oo kibir badan, waxa uu ku

dadaal jiray cibaadada isaga iyo aabbihii Sakariye, waxa ay aad u joogtayn jireen ducada har iyo habeen.

Dilkii nabi Sakariye iyo Yaxye CS

Nin boqor ahaa oo ka talin jiray meel ka tirsan Shaam ayaa damcay in uu guursado gabar kamid ahayd maxaarimtiisa, Nabi Yaxye CS ayaa u sheegay in aanay bannaanayn arrinkaas, boqorka iyo gabadhiiba waa ay ka xanaaqeen hadalkii, waxay gabadhii shardi uga dhigtay boqorka in la soo dilo nabi Yaxye CS haddii uu guur doonayo; halkaas ayaana lagu dilay nabi Yaxye CS, boqorkii waxa uu ka baqay in nabi Sakariye uu habaaro, isagiina waa ay dileen, Allaah Subxaanah watacaalaa waxa uu nimankaasi ku salliday boqorkii Baabil ee la oran jiray Bukhtnasar oo dilay dad ka badan 70,000 oo iyaga kamid ah.

Aayadaha ka warramaya qisada nabi Sakariye iyo yaxye CS waxaa kamid ah:

وَزَكَرِيَّا إِذْ نَادَى رَبَّهُ رَبِّ لَا تَذَرْنِي فَرْدًا وَأَنْتَ خَيْرُ الْوَارِثِينَ (89) فَاسْتَجَبْنَا لَهُ وَوَهَبْنَا لَهُ يَحْيَى وَأَصْلَحْنَا لَهُ زَوْجَهُ إِنَّهُمْ كَانُوا يُسَارِعُونَ فِي الْخَيْرَاتِ وَيَدْعُونَنَا رَغَبًا وَرَهَبًا وَكَانُوا لَنَا خَاشِعِينَ (90)

Zakariyena xusuuso markuu u dhawaaqay Rabbigii isaga oo leh Eebbow ha iga tegin anoo keli ah adaa u kheyr roon cid wax dhaxashee(u hadhee)《》 Waanu ajiibnay baryadiisa waxaannu siinay Yaxye waxaana u hagaajinay haweentiisii waxayna ahaayeen kuwo u degdega kheyraadka oo na barya iyagoo rajaynaya cabsanayana waxayna ahaayeen kuwo noo khushuuca ([22])

---

[22]. Suuradda Anbiyaa'

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani ?

1. Eebbe weyne wax kasta waa uu awoodaa.

2. In si ikhlaas ku jirto aad u ducaysato, waxaa lagu aqbalayaa ducadaada.

3. Allaah waxa uu irsaaqaa cidda uu doono.

4. Macsiyada iyo xumaha waxay sabab u yihiin balaayo kasta.

5. Yuhuudda waxay dileen ambiyadii Alle qaarkood.

6. Markasta lagama quusto xagga Allaah.

7. In Rabbi lagu kalsoonaado oo si niyad ah wax loo weydiisto waa muhiim.

Qisadii Nabi Ciise

Nabi Ciise

Waxaa jirtay gabar la oran jiray Xanna, odaygeeduna waxaa la oran jiray Cimraan, Xanna waxay ahayd qof cibaado badan, waxa ay la dhalatay islaantii nabi Sakariye CS. Waxa ay degganaayeen meel u dhow bayt Almaqdas, waxay jeclaatay in ay dhasho wiil wanaagsan oo ka adeega masjidka Qudus, waxay Alle ka bariday in lagu irsaaqo ilmo wanaagsan, waxay dhashay gabar wajigeeda ifaya oo qurxoon, waxayna u bixisay Maryama, waxay Alle uga bariday in uu ka dhigo mid cibaado badan oo sheydaanka laga dhowray iyada iyo durriyadeedaba, Allaah waa uu ka aqbalay ducadeeda, waxay horay ugu nadartay haddii ay umusho in ay masjidka geyn doonto si uu ugu khidmeeyo, waxay keentay masjidka waxaana kafaalo qaaday nabi Sakariye CS.

Maryama bint Cimraan waxay ku soo barbaartay hoygii nabi Sakariye CS, waxay ahayd qof aad u cibaado badan.

Ducadeeda oo badan iyo dhowrsanaanteeda waxay u soo jiiday in dadka oo idil ay ixtiraamaan. Maryama waxay ahayd gabar ilaahey u dooray nadaafad iyo dhowrsanaan, waxay ku dadaali jirtay rukuucda, sujuudda, cibaadada, ducada, iyo salaadda.

Maryama badanaa kama bixi jirin mixraabka in ay dan soo gasho mooyee, maalin waxa meel ka aragtay qof, waa ay ka xijaabatay, waa Malakul jibriil oo suurad bani'aadam ku yimid si uu ugu bishaareeyo, markay aragtay qofkaa waxay tiri: Eebbe ayaan kaa magangalay haddaad Alle ka baqayso, waxa uu ku yiri: Waxaan ahay ergay uu Allaah soo diray si uu kuugu hibeeyo wiil wanaagsan, waxay tiri: Sideen wiil ku dhali karaa aniga oo aan marwo ahayn qof xunna aanan ahayn, waxa uu ku yiri: Waa sida uu Rabbi doonay, waa ay u fududahay, waxaana loo abuuray in uu mucjiso iyo nabi u noqdo ummada, Maryama bintu Cimraan oo xaamilo ah waxa ay timid geed timir ah oo engagan hoostiisa, halkaas ayayna ku umushay.

.kolkii ay aragtay xaaladda ay ku jirto ayay murugootay waxay tiri: Shalaytadaydiiyeey maxaan marhore u dhiman waayey oo la ii ilaawi waayey, meel aan ka fogayn baa laga la hadlay waxaa lagu yiri: Ha murugoon Eebbe ayaa webi kuu sameeyay, gilgil geedka timirta ah si ay timir kuugu soo daadato, is deji oo indho qabowso, haddaad aragto qof wax xun kugu tilmaamaya ku dheh waxaan nadar ku galay inaan hadalka ka soomo.

Maryama oo sidata ilmaheeda ayaa soo gaartay reerkii, markii reerka arkeen ayay la murugoodeen waxayna ku dhaheen reerkaagii wanaagga looga bartay miyaad ka baxday, waxay farta ugu fiiqday ilmihii yaraa iyada oo aan jawaabin, dadkii baa la sii yaabay oo yiri: Sideen u la hadalnaa ilmahan yar ee hadda dhashay ee aan hadli karin?

Wiilkii yaraa ayaa si mucjiso leh ugu jawaabay dadkii oo yiri: Waxaan ahay addoon Alle oo lagu sharfay kitaabka injiil, nabi ayaa la iga dhigay, waxaa la ii dardaarmay oo la ifaray salaad, iyo sako inta aan noolahay, Waxaa la iga dhigay mid u baarri fala hooyadii, nabadi ha ahaato maalinta aan dhashay, maalinta aan dhimanayo, iyo maalinta la isoo saari doono. Dadkii baa la yaabay arrinkaasi mucjisada leh, nabi ciise waxa uu sheegay in uu yahay addoon ilaahey ee uusan ahayn wiil uu dhalay [Subxaanallaah].

Nabi ciise cs markii uu weynaadey waxaa la siiyey xikmad iyo ogaal, culimadii Yuhuudda ee waqtigaasi waxay danaynayeen oo kaliya hanti iyo magac, waxa ay beeniyeen aakhiro iyo nabi ciise.

Nabi ciise cs waxa uu sii waday in uu diinta ugu yeero dadka si ay ugu hanuunaan tubta wanaagsan, waxaa la siiyay nabi ciise mucjisooyin badan sida: in uu amarka Alle ku soo nooleeyo maytada, in uu aragga u soo celiyo indhoolayaasha, in uu daweeyo baraska Eebbe idankii, iyo mucjisooyin kale oo badan, balse reer Bani israa'iil ma aysan rumayn nabi ciise cs.

Nabi Ciise CS waxa uu mari jiray meelaha la degganyahay, sida tuulooyinka iyo magaalooyinka, isaga oo ay la socdaan koox Xawaariyiin la yiraahdo oo rumeeyay, kuwaas oo garab ka siin jiray dacwada.

Maalin ayaa Xawaariyiintii waxay nabi ciise ku yiraahdeen: Ciise ina Maryamow Eebbe noo bari si uu noogu soo dejiyo xeero (cunto) samada nooga timaadda, waxay ku sababeeyeen codsigooda in ay rabaan in ay quluubtooda xasisho oo iimaankooda ay xoojiyaan, nabi ciise waxa uu baryay Allaah, ducadiisana waa la aqbalay mucjisadaasina waxaa ku soo islaamay dad badan, Xawaariyiintana waxaa u kordhay iimaan.

Yahuudii reer bani israa'iil waxay aad uga xumaadeen dadkii diinta ilaahey galay oo rumeeyay nabi ciise, waxayna go'aansadeen in ay dilaan nabi ciise, balse Allaah Subxaanah watacaalaa ayaa samada u qaaday nabigiisa, iyagiina waxay dileen nin u ekaa nabi ciise, sida uu Allaah

Qur'aanka noogu sheegay. Nabi ciise cs waxa uu soo degi doonaa aakhiru samanka, waxayna soo degitaankiisa kamid tahay calaamadaha waaweyn ee qiyaamaha.

Qur'aanka meelo badan ayaa kusoo arooray Qisada nabi Ciise CS:

وَإِذْ قَالَ عِيسَى ابْنُ مَرْيَمَ يَا بَنِي إِسْرَائِيلَ إِنِّي رَسُولُ اللَّهِ إِلَيْكُمْ مُصَدِّقًا لِمَا بَيْنَ يَدَيَّ مِنَ التَّوْرَاةِ وَمُبَشِّرًا بِرَسُولٍ يَأْتِي مِنْ بَعْدِي اسْمُهُ أَحْمَدُ فَلَمَّا جَاءَهُمْ بِالْبَيِّنَاتِ قَالُوا هَذَا سِحْرٌ مُبِينٌ (6)

Waxaad xustaa(nabi Maxamedow) goortii uu nabi ciise yiri Reer Banii israa'iilow waxaan ahay rasuulka Eebbe ee xaggiina loo soo diray oo rumaysan kitaabkii towraad ee horeeyay kkuna bishaaraynaya rasuul gadaashayda imaanaya magaciisuna yahay Axmed, markuu xujo cad ula yimidna waxay dhaheen kani waa sixir cad ([23])

Maxaynu ka baran karnaa Qisadani?

1. Allaah waa waaxid, wax ma dhalin isaguna lama dhalin.

2. Maryama waxay ahayd gabar dhowrsoon oo kusoo barbaartay guri sharaf badan iyo nasab karaamaysan.

3. Nabi ciise waa addoon Alle oo nabi ah.

---

[23]. Suuradda As saf

Tixraac

Qur'aanka kariimka.

Qur'aanka kariimka tarjamada afka soomaaliga (Sheekh maxamuud maxamed Cabdi)

Qisas Al ambiyaa' Ibnu kathiir.

Qisas Al ambiyaa' Mascad xuseyn.

Qisas Alqur'aan muxaadarooyin Sh Aadan saciid.

Tafsiirka Qur'aanka Sheekh Maxamed dirir.

Tafsiirka Qur'aanka Sheekh cumar faaruuq